
Dhambaalkii
Naxriista...
Qore:
Yaasiin J. Falaxfalax

# Q E Y B T A 1 a a d

## Waxay gashay soodaalkii qasbanaa !!!

Waa maalin Khamiis ah bartamihii Luulyo, waqtigu waa 3:30 galabnimo; waa cadar, waxaana cirka oo dhan daboolay daruuro xambaarsan biyo xagaayo hase yeeshee aan da'aynin. Waxaa socota saxansaxo udgoon, waxaana sida miigag carbisan hawada sii soo jiidasho leh u dhex dabaalanaya shimbiro kala nooc nooc ah oo aad moodo in ey maaweeliyeyaal casri ah u yihiin dadweynaha deggan degmadan. Meel u jirta 50 tallaabo waxaa mushaaxaya webiga Shabeelle, waxaa wadadda hareereheeda camiray dhir khudradeed iyo fiyooreyaal nafta aragta uusan damiirkeedu u saamaxeyn iney sahal ku dhaafto.

Run ahaantii jawiga galabtaa iyo gaar ahaan goobta oo aheyd rug loo daayey dalxiis wanaag waxay ahaayeen kuwo naf kasta ku abuurayey farxad iyo reyn reyn xad dhaafa, laakiin labadan waxaa qalbiyadoodu la ciriiryoomeen murugo iyo tiiraanyo. Xaqiiqdii maalintaa ka hor Axmed wuxuu isu heystay inuu yahay shakhsi hal adeyga oon u nugleyn hagardaamooyinka waayaha, balse mar kaliya ayey mowjado xoog badani oo ku socda xowli dheeraad ahi ha-

-reereeyeen. Tiiraanye awgeed ayuu habdhiska neef-sashada ee jirkiisu awoodi kari waayey inuu si caa-diya u wato howlihiisa; wuxuu is arkay labadiisii indhood indhood oo ilmo kululi uga soooto sida qasabad bi-yo ah oo la furay.

Layla qudheedu baaoyo ayey dheeroyd, waxaana la-badooda wada heshay musiibo aan u kala eexan. In-dheheedii aad moodeysay sida ukun saafi ah oo loo il-aaliyey sida madi uu dhalay boqor qabi ahi waxay u ekaadeen dhibic guduudan oohin awgeed.

Degaankoodu ma ahayn dogmadan; dalxiis iyo aad ku-soo tamashleysaana uma aysan iman, balse waxaa geysay arrin oajiib ah oo si aysan raalli ka aheyn loogu qas-bay. Soddon daqiiqo ka hor intii aysan tegin degma-daa ayuu Axmed si sagootin ah baabuur NISSAN ah ula sii raacay gacaladiisa Layla oo Xamar ka baxaysay.

Inkasta oo rakaabka baabuurka saarnaa ay ka muuqa-tay farxadi, mararka qaarkoodna kuwo ka mid ahi ay la dilaaci gaarayeen qosol; Axmed iyo ta beer qaaday Lay-la midkoodna kalama qeyb qaadaneyn. Xataa labadooda



sheekada dhex mareysay ma aheyn mid daqiiqado qaada-ta; taasina ma aheyn celaad iyo ciil ay caloosha is-ugu hayeen balse mid kasta oo ka mida waxay qeybta xusuusta ee maskaxdiisu ku mashquulsaneyd raadinta wadada ugu sahlan ee ay dhismaha mustaqbalkooda u mari karaan. Waxaa qalbiyadooda sida danabka u dhex marayey maayado tiiraanyo ah.

Layla oo indheheeda ilmo buuxisay ayaa cod hoose ku weydiisay Axmed:- " Abboowe inkasta oo aan sabab-saneyno ayaan darrada waayaha iyo nasiibkeenna oo xumaaday haddana waxaan kugu waaninayaa in aad sami-rka kaashato oo sugto xilliga nasiibkeennu hoodada isu badeli doono, geedkii jacaylka een ku abuurnay illinteenna miraha macaan ee uu dhali doonana si wa-da jir ah farxad ugu wadaagi doono."

Inkasta oo Axmed aad ugu khushuucay erayadaas Lay-la haddana wax jawaab ah masiin muddo daqiiqado ku si-man, dareemayaashiisa oo aad u kacsanaa awgeed. Mar-kuu xoogaa aamusnaa buu inta dhankeeda soo jaleecay yiri;- " Abbaayo wax waliba waxay u dhacayaan si ca-jiib ah, wax kasta oo nala soo dersana waa wax noo id-manaa oo eebbeheen noo qoray markaan xab iyo biyaha

aheyn oon jiifnay ilmo-galeenka hooyooyinkeen, inkasta oon qadarka ilaahay la dhaafi karin haddaba waxaan ballan adag kuugu qaadayaa iyo axdiba inaan wacadkeennu dhankeyga marnaba ka wiiqmin ee Abbbayo xilli kasta adna ka digtoonoow kuwa loogu dowgalay kala geynta wadnayaasha isdoorta.

Wax yar ka dib ayuu baskii istaagay kulanka baabuurta "busteejada" ee degmada Afgooye, halkaa oo soodaalkiisu ku ekaa. Baskii bey ka degeen, waddadiina u raaceen dhanka woqooyi-Bari iyaga oo tiigsanaya geedka weyn ee garaska ah ee baasha shishe kaga yaal degmadaa.

Tobankii daqiiqo ee ay usii socdeen goobtaa waxaa u soday ilaah bari uu midkoodba kan kale ugu duceynayey inuu eebbe salaamo yeelo, inta xun oo dhan ka xijaabo, meel kasta oo uu tagana uga dhigo hoy uu mahadiyo.

Waxay gaareen goobtii qasdigoodu ahaa oo aheyd halka ay ka baxaan baabuurta ku socota gobollada Koofureed ee dalkeenna. Waxaa dhooban dad fara badan oo isugu jira kuwo wax gadanaya, kuwo baa-



-buur sugaya, kuwo iyagu dalxiis iyo tamashle u yimid magaalada oo ku mashquulsan daawashada jawiga cajaa'ibka badan ee galabtaa degmadu laheyd iwm. Waxay beegsadeen meel ka durugsan buuqa dadka oo ay ku nastaan, inta uu ka imaanayo baabuurka ay sugayaan.

Caku adduunyo, illeen horaa loogu daalay oo wax weliba kuuma noqdaan sidaad ugu talo gashay; daqiiqad waxaan ka badneyn markey hadallo waano iyo sagootina iskula dardaarmayeen ayuu soo istaagay gaari jsjiid ah oo uusan dad badani guudkiisa saarneyn. Durbadiiba kaarigii baa inta dhulka soo degay yiri;-"Haye.... Yaa sooda?....Yaa sooda? ..... Waa degmo hebla....."

Run ahaantii weedhaasi waxay Axmed ula mid aheyd fallaadh looga toogtay halbowlaha wadnaha oo dhiigga kala haga, waayo wax kasta kuma doorsadeen tegidda Layla haddii aysan ahaan laheyn xukun eebbe; daqiiqadda kaliya ee ay la joogtaana waxay u aheyd guul iyo saoaado qiyaas la'aana oo qalbigiisu hantay.

Wax waliba waxay u dhaceen sidii loogu tala galay, waxaa yimid waqtigii ay Layla u bixi laheyd soodaalkii qasbanaa. Si lama filaan ah ayuu midkoodba kii kale ugu xaday deymo kalgacal oo xeel dheer. Si aa-

-musnaan iyo xishooda ayuu midba kii kale dhunkasho macaan dhabanka uga dhiibay dhowr jeer; sekenno ka dibna Axmed wuxuu kor usoo qaaday shandadii ay dharka iyo sahaydu ugu jireen Layla.

Si cago jiid ah a yay ugu soo dhaqaaqeen dhankii gaariga. Layla intey il naxariis/// iyo muxibo ma asheysay kusoo jeleecday Axmed bey ood qaboow ku tiri iyadoo xoogaa socodkii hakineysa;- " Gacaliye nabadgelyo, ilaahna hanaga yeelo kuwii kulankooda dambe ku gaara caafimaad iyo nabad, ifkana isku calfada. Ogoow inkastoo jimsigeygu kaa tagay inaanan haddana ku moogaan doonin meel kasta oo aan tago iyo waqti kasta oo aan joogaba, uuna qalbigeygu hoy dugsoon u yahay xusuustaada waqti kasta.

Nin aan adiga aheyn abboowe hilibkii aabbahay buu iga yahay inta aad nooshahay, adna xabiibkeygiyoow ha noqon laba wajiile hadba tii cajiba u riyaaqa. Ogoow in kagaankayga oo badan aan u dabranahay aawadaa muddo kasta ha igu qaadatee.."

Xishood cishqi awgii ayuu inta hoos u jeestay ugu jawaabay isna;- " Waxay ila tahay abbaayo ifka waxaan



ku leeyahay hal qof oo aan molosha wada qeyb sano, si aan qofkaa ku helo waxaan galay xulasho iyo raadis dheer; waxaad tahay qofka kaliya een dhowrka bilyan ee dumara ee dunida ku nool ka doortay, waxaan kuu ballan qaadayaa gacaliso inaanan damcin gabar kale adoo nool. Haddii ay jiraan laba waxad kala qaaday ee u cofisay sidii uu ahaa ilaahna u aqbalay aroos farxadeed ee ay wada jir u dhisaanna labadeenna ayey noqon ee abbaayo macaan nabadgelyo."

Waxay ag yimaadeen gaarigii, Laylana waxay laacday guudkiisii; Axmed wuxuu kor ugu dhiibay shandadeedii, wax yar ka dibna Layla waxay salka saartay boos ay xulatay.

Axmed wax walba waxaa halmaansiiyey xusuusta waayihii farxadeed ee ay soo qadinteen isaga iyo Layla, waxa dhacaya oo dhan waxay ugu muuqdeen wax khiyaali iyo riyo ah. Inta uu dhowr tallaabo dib u baxay oo istaagay meel uu si saaniya uga arki karo boqoradda caashaqiisa Layla buu deymo kalgacal ka dhex dusiyey xubnaheedii qaaliga ahaa ee eebbe haybaddá iyo quruxda ugu deeqay. Waxaa la tagtay mowjad la ciireysa xusuus waayo waayo ah, wuxuuse ku baraarugay codka sheelarihii gaarigii sidey Layla ka dib markuu cagta ku cadaadiyey wadulnu.

Waxaa deymada aragiisu soo jiitay Layla oo gacanteeda midig hadba dhan ugu ruxeysa si ay u nabadgelyeyso.

Inta qumaati isu taagay oo labadiisii gacmood kor u qaaday, aadna isugu qabtay ayuu maadaama uusan hadal la gaarin cod hoose ku yiri;- ".Nabadgelyo gacaliso, ilaahna hortaada ha dhigo waqti kasta wax aadan dhibsan. Meeshii aad tagtaaba kusoo dhaweysay iyo erayo kale oo uu xushay.

Sekenno ka dib waxaa wareegay shaagii gaariga, baabuurkiina waa dhaqaaqay. Axmed wuxuu galay aamus dheer, wuxuuna si tartiiba isha ula raacayey ulana socday dhaqdhaqaaqa muuqaalka dahabiga ah ee tan beerqaaday.

Humaagii aragii Layla ee ku weynaa naftiisa si aayar aayara ayuu uga sii fogaanayey Axmed ilaa uu ka libdhay muuqii gaarigu. Intuu labada indhood xoog isugu qabtay salkana dhulka ku dhuftay ayuu haddana galka ka jiiday sidii ay Layla dib ugu noqoneyso. Xusuus qaaliya iyo muhasho kalgacal ayaa kusoo maaxday, weli waxaa dhegihiisa kasii yeerayey codkii dahabiga ahaa, naxariista iyo asluubta loogu dowgalay ee Layla.



Inta uu madaxa hadba dhan u ruxay siduu is ilowsiin karo mucjisada madasha taal buu cod hoose niyadda uga luuqeeyey;-"Gaariga ninka wadoow gacaladeyda guudka saaran ogoow, gaariga ninka wadoow wadnaheyga galowdiisa guudka saaran ogoow, gaariga....."

Waxaa u bilaabatay nolol adag:

Markuu cabaar siduu cirku kusoo dumay meeshiisii runduday buu ouskaday labada jilib, istaagna u holladay. Dhankiisa bidix ayuu jaleecay, isaga oo tallaabada qaadi la'na si miisaaman u dhaqaaqay. Tagsi meesha taagnaa ayuu iska furay daaqadiisa dambe, cod hoosena ugu sheegay wadihii;-"Wallaal i gaarsii busteejada baabuurta Xamar u socotaa ka baxdo " si uu Muqdisho ugu soo galbado.

Markuu tagsiilihii goobtuu rabay keenayna inta siiyey wuxuu ijaar ahaan xaq ugu lahaa buu beegsaday baaburrkii Muqdisho u rarnaa, ilbiriqiyo ka dibna wuxuu salka dhigay boos uu xushay.

Intii basku kusoo jirey fogaanta u dhexeysa Xamar iyo Afgooye waxaa rakaabka baska dhexmarayey sheeko googoos ah oo ay isdhaafsanayeen. I kasta oo Axmed daawanayey filim cajiiba oon lala wadaagin, aadna usoo jiitay, haddana wuxuu isha la raacayey doodda iyo war

is-dhaafsiga rakaabka baska saaran.

Booddu waxay u badneyd dhaliil caam ah oo dusha laga huwinayey dhallinyarada maanta. Waxay isku raaceen waayeelkii baska saarnaa in dhallinyaradu ay lasoo shaac baxeen waqtigan waxyaabo ka yaabiyey waxgaradka, iney caadeysteen ku dhaqanka ammuro aad uga fog hiddaha, dhaqanka iyo diinteenna muqadaska ahba, iney wiil iyo gabarta ku caasi garoobeen waalidiintood iwm.

Xaqiiqdii aad buu Axmed u yaabay markuu dhambaal wadaha dareemaha dhegtiisu usoo tabiyey craah uu soo jeediyey nin waayeel ah; wuxuu yiri;- " Dhallinyaradu magga guurka waqtigan waxay ka dheereynayaan guuxooda, waxaa laga yaabaa in laba ka mid ahi maanta is bartaan, caawa is mehersadaan, berri isla aqal galaan, saadambena is furaan!!

Waxay aad u qiima tireen is guursigii iyo furriinkiiba. Waxaan mlono la lehyn qiimaha uu qoyska dhismayaa ku leeyahay Mujtamaca, ma oggola iney waalidiintood u xulaan guur wanaagsan oo saaado iyo wada dhaqan aadaminimo oo waara leh, iyaguna meel iskama soo saari karaan. Jaceylkoodu ma aha mid daacad ah oo xulasho dheeri ka dambeyso ee waxaa uu midba kan



kale ku sabaa niyad khiyaali ah iyo muxibo cimrigeedu maalmo yahay, isaga oo midba kan kale ku wato dan gaara.

Waanada waalidiintood ayey u arkaan iney tahay mid kasoo fushay maskax gabowday, iyaguna meel iskama soo saari karaan. Haddiiba ay dhacdo in laba ka mid ahi is guursadaan xilligoodii ay ku jireen xiisaha toddobaadka inta badan nasiib uma helo qoyskaasi inuu waaro si uu u sanad jirsado, haddii uu sanad jirsadana kama marnaado is xag xagasho, buuq iyo muran joogto ah, taasoo aakhirka dhalisa in lagu kala boodo guurkii gurigiina halkaa ku dumo."

Run ahaantii aad bey craahdaasi u danaqday Axmed waayo waxay khuseysay dhibaatada uu la sakaraadayo. Niyadda ayuu iska yiri;- " Alla aqoon darro weynaa, miyeysan ogeyn in sida uu san eebbeba u simin shanta farood ee isku calaacal ku yaal uusan isku caqli, feker iyo garasho toona ka dhigin aadamigiisa. Haddii ay la kulmeen kuwo dhaqan doorisyeyaal ah maxay dambiga u wada huwinayaan dhallinta oo dhan, anba haddii damiirkeygu ii saamixi lahaa inaan ku gacan seyro fikradda waalidkey maanta taniba ima qabsateen."

Cabbaar ka dib Axmed wuxuu ku baraarugay baskii oo weydaartay goobtuu uga hari lahaa. Inta qaarka hore la kacay buu si dabaosan uga oodsaday kaarigii inuu baska u joojiyo, ka dibna isaga oon is ogeyn meel uu marayo buu u luuday dhankii guriga.

Intuu sagni isaga furay oo halhaleel hoosta uga xirtay qolkiisii buu isaga oo kabihiisii qaba isku tuuray sariirta.

Wuxuu dareemayey daal aad u badan, maxaa yeelay in ka badan 36 saacadood oo xiriira ayuu dhex dabaalanayey badweyn murugo ah. Wuxuu ku dedaalay inuu caadi ka dhigo xaaladda dareemayaashiisa si uu u daal tirto, intaa ka dibna wuxuu balleeyey waxaan hurdo la oran laakiin uu u haystay iney tahay suuxdin dheer.

Inkastoo firfircoonaan, karti iyo adkeysi lagu yiqiin yiqiin Axmed hadda waxaa ka tan badiyey jacaylka tiiraanyada ku reebay, ilaa uu ka noqdo mid aan waxba qabsan karin. Waxaa laga haystay meel uusan aqoon, wuxuu kusoo baxay qof maahsan oo ku jira aamusnaan dheer.

Awooddiisa garasho waxay inta badan la haysatay



meel boqollaal KM ka fog degaankiisa, wuxuu had iyo jeer isku dayayey gorfeynta talo uu ka gaari waayey xal sugan. Waxaa goor kasta qalbigiisa kusoo maaxanayey xusuus joogto ah iyo gocasho uu gocanayey gacaladiisii Layla ee waayuhu kala fogeeyeen. Waxay hadba sida magnadkii qeybta xusuusta ee maskaxdiisu soo jiidaneysay erayadii macmacaanaa ee ay Layla kula fardaarmeysay markii arageeda ugu dambeysay;- "Ogoow inkastoo jimsigeygu kaa tagay inaanan haddana ku moogaan doonin waqti kasta ee uu qalbigeygu hoy dugsoon u noqon doono xusuustaada......"

Intii ka dambeysay tagidii Layla Axmed salaad qura ma tukan haddii uu tukadana inta gaomaha sare u taago ayuu ilaaha wax walba awooda ka baryayey inuu waafajiyo jidka toosan adduun iyo aakhiroba, mar uunna indhaha u saaro isaga iyo Layla oo loo dhigay aroos farxadeed, guur xalaal ahna gaomaha isu heysta oo nolol raaxo iyo sacaado leh isaga ag waaberiisanaya.....

" Allahayoow naf daacada iyo niyad u saafiya naxariistaada ugu deeq...................... "

## Gacaliye iska ilooW gaba dhaa!!!

Axmed ma aheyn aqoon iyo rajo midna, kamana dhalaan qoys saboola ee wuxuu curad u ahaa reer X. Ciise oo inkastoo aysan hanti buuran laheyn haddana ku nool nolol caadi ah, kama jiraan dhul dheer ee waxay baal ka deggan yihiin Muqdisho. Maalintii in ka badan toban jeer buu Axmed ta gi karaa reerkooda laakiin sidey u tagtay Layla ma booqan gurigooda xataa daqiiqad qura.

Qoyska reer X. Ciise laftoodu ma deyrin wiilkooda, waxayna soo raadsheen dhowr jeer, reerka uu aqalkooda Axmed q olka ka deggan yahay baase u sheegay in Axmed joogo laakiin aysan aqoon meesha uu aado. Siiba Nasro oo Axmed walaashii ah baa wadar jeer soo raadisay laakiin kalama kulmin qolkiisii waxaan fara xamuun aheyn.

Laba toddobaad co ku dha n markii ay kasoo wareegatay waqtigii isugu dambeysay Axmed iyo reerkooda oo aheyd maalintii qasabka lagu dhoofiyey tii uu ifka ka calmaday, boqorradii caashaqiisa Layla, maalinimo Axad ah shantii galabnimo ayaa isaga oo sariirta dusheeda ku akhrisanaya buug lasoo gargaraacay albaabka. Iftiinka cadceeda galabnimo oo albaabka hayey awgii ayuu dareemay in qofka iridda taagani yahay ruux dumar ah, wuxuu u qaata y iney tahay hooyadii gacalo. Inta buu-



-gii dhinac isaga xooray buu usoo dhaqaaqay dhankii albaabka, markuu iridii fureyna waxaa kasoo her baxay wax uu la yaabay.

Waa gaba r inana oo qurxda haybadda iyo suuradda Ilaah siiyey il aragta mooyee aan tu kale looga sheekeyn karin. Xaqiiqdii qofka milicsadaa wuxuu is oran lahaa waa mid ka mida kuwii ugu biliida samaa hablihi xuuraleeynta ee eebbeheen noogu sheegey quraankiisa.

Markii ay indhaha saartay bey usoo taagtay salaan, markuu gacan qaadeyna waxay dama oday iney dhunkasho u dhiibto gacantiisa midig, hase yeeshee hoos ayuu u jiitay isaga oo muujinaya sida uusan raaliga uga aheyn falkaas, niyaddana iska yiri;- " Haddii aysan jiri laheyn salaanta xaqa ah ee eebbeheen wujuubiyey iyo martida aad ku tahay gureyga kuma gacan qaadeen, arrintuna sidan way ka badalnaan laheyd." oo inta soo dhaqaaqay isku xooray sariirtiisii.

Tuma ayaad u maleyneysaa iney tahay gabadhaasi? Waa ina adeertii Basra. Waa tii u sabab aheyd dhibaatada la derstay Axmed iyo Layla, waa tii aawadeed lagu kala faquuqay labadooda, waa gabadha ay waalidkiis ugu sacabe tumayaan iney ceri u noqoto, iyaduna ka jeccl labadeeda indhood, niyadda Axmedse sidii magnadkii ayey ku dhegtay meel, umana qabo wed mooyee wax kale iney kala furfuri kara an muxibadda shindhaladka ah ee isaga iyo

meel

Layla u dhaxeysa, balse aan dhowro natiijada.

Basra muddo dheer ayey hor fadhiday muraayadda markii ay kasoo kacaysay aqalkooda, waxay soo xiratay dharkeeda kii ugu wacnaa, una soo labisatay si cajiiba oo labanlaabtay quruxdeedii iyo haybadeedii gabarnimo, isha aragtaa saacado kama jeesateen muuqaalka Basra, Axmedse uma qabin marna in gabar mara xiratay Layla ka sharaf iyo haybad badan tahay, balse sabooltinimadu criikriday.

Waxay Basra galabtaa ku tala gashay iney intii karaankeeda ah waxba kala harin sidey kusoo jiidan laheyd Axmed, niyadiisana uga tirtiri laheyd midda maanqaaday.

Markuu ka furay guriga ee intuu gacan qaaday isku duuduubay sariirta ayey inta laacday kursi meesha yiil oo sariirta agteeda soo fariisatay eegmo kalgacal oo xeel dheer muquurisay Axmed iyadoon libiqsaneyn.

Markey cabbaar kala aamusnaayeen buu inta buugii gacanta ugu jirey isku laabay oo soo eegay yiri;-"Wallaal maxaa darnaa?"

Basra uma jawaab celin cabbaar ayeyna ka aamusneyd iyadoo saluugeysa su'aashiisa. Axmed oo sugayeye warcelinteeda baa mar kale yiri;-"Maxaad iigu jawaabi weyday? Maxaase kugu dhacay ood la hoganeysaa?

Basra baa sidey hurdo kasoo naaxday inta indhaha ka mirig mirig siisay tiri;-"Abboowe macaan maxaad isaga



dhigeysaa sidii wax khabar daara oon waxba ogeyn. runta marka loo hadlo waad ka baxsan tahay waxa meesha i keenay, gacaliye aniga oon guur iyo gayaan midna waayin baan kaa doortay dhallinta faraha badan, waxay niyaddu kaa dhex xulatay kumaankunka gayaankeyga ah, waxaad waqti kasta wehel la tahay wadnaha iyo waaxyaha jirkeyga, waxaan had iyo jeer dugsadaa xusuustaada, iyada oo weliba waalidiinteen iskaaya siiyeen.

Marar badan baan kuugu imid arrintan darteed balse aad igu gacan sayrtay, galabta abboowe waxaan kaa doonayaa go'aan farax leh oo aayeheenna na anfaca oo aad si ka fiirsasho leh u gorfeyso.

Waxaan kaloo kaa codsanayaa saygeygii mustaqbalkoow inaadan warna qaadan go'aan xad guduba. Waxaan kaa filayaa inaadan noqon sidii ninkii indhaha la'aa ee indhaha inta loo furay arkay maroodiga ag maraya, ka dibna indho beelay oo wax kasta oo loo sheego dhihi jirey"Maroodi see ka yahay?"

Axmed oo xanaaqsan garteyna sarbeebta Basra baa si kulul u yiri;-"Waxaad ogaataa Basraay haddii waxa gabar dunida joogta horteyda la keeno oo inta Qorraxda gacanta midig la iga saaro Dayaxana gacanta bidix, la i yiraahdo midda gabdhahaas ugu haybadda

iyo quruxda badana qacab ku guurso Laylana is-
ka iloow, u maleyn maayo iney oori ii noqon la-
heyd mid aan aheyn Layla.

Xagga guurka labadeenna waxaan hubaa inaad
t hay gabar aad u dhowrsan oo edeb, akhlaaq iyo
haybad dumarnimoba leh. Hadday run kaa tahay oo
aad tahay guur doon waxaan hubaa inaad heleyso boqol
-boqollaal wiil oo iga wada fiican, aadna ka xulan
karto mid aayahaagga anfaca ee waxaan kugula tali-
nayaa walaal in uusan waqtigu kaa lumin laguuguna
maaweelin waxaan suuroobi doonin berri. "

Basra oo xoogaa maseyr iyo xanaaq isugu jiraa
galay ayaa tiri;- " Wiilashaa aad sheegeyso ma dhaa-
fsa deen abboowe xuhin fartaada ka mida; waayo,
adiga ayaan ku bartay, walaalkeyna ah; qalbigeygu
ku raacayy ee gaca liye gayaankaa ku jecel baan
ehee yaan nabsi ku raacin."

Inta si aada indhaha ugu gubay buu yiri;- " Wa-
llaal miyaada n aqoon sida loo quusto, waa habeen-
kii xalay ee taga y inaanan xataa haddii la iga sco
laalaadiyo hawada oo ba dbaadadeydu tahay inaan oa-
loosheyda ka goosto gaca ladeyda Layla aanann guurê
san gabarr kale iyada oo ifka saaran. Intii aaan
jebin lahaa cahdigii iyo wacadkii aan la galay geeri



baan ka doortay ee sidaa walaal ku raalli noqo, laba-
deenuna walaalo baan nahay, ee caloohaada u sheeg "
Axmed baa hadalkii kusoo gabagabeeyey idaga oo dii-
dan iney dooddu sii soooto maadaama go'aankiisu meel
yahayy .

Basra inta istaagtayy bey igu warcelisay iyada oo
ka xun hadalkaa:- " Sida ay qalbigaaga u qaaday Ax-
medoow gabadhaasi ayaan anna isu kaa siiyey ee wal-
aal godob ka iga gelin " oo iridda ka baxdayy Axmed-
na isaga oo inuu hadalkaa maqlay iyo in kale aan kala
ogeyn buu buugiisii isaga sii jeestay.

Hooyo Naftu ma oggolee iga daa !!!!
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Basra sidey usii duuleysay bey garbasaarteedii ku
ag tuuratay hooyadeed Xaadsan iyada oo aad u kacsanna
tiri;- " Hooyo waxaad waqtiga igaga qaadeen waxaan
maslaxadd iigu jirin, wiilkii aad ilaa caruurnimadey-
dii igu shukaamineyseen wuxuu galabta ii geystay ilaah
baa ogaa; illeen nin xaas leh baad madaxa iigu kakabi-
neyseen. Waxaaba waxaa iigu wacnaa adiga iyo aabbe-
hay " oo inta baroor qabsatay isku duuduubtay sariir-
ta.

X. Ciise iyo Cowralla, Axmed waalidkii ayaa la gaar-
siiyey falkii Axmed ku kacay. Axmed aabbihii wuxuu ahaa
odey aad u kulul, xanaaq badan, go'aankiisana aan laga

hor iman karin. Sidaa awgeed hooyo Cowralla oo ogeyd haddii xaajiga oo sidaa u kacsan u tago wiilka laga yaabo inaan halkaa wax faa'iido ahi kasoo xasilin, ayaa goosatay iney iyadu marka hore aado inanka, runtana dhegeha ugu shubto. X. C isena waa ka aqbalay.

Galabtii dambe ayey hooyo Cowralla soo gargaraacday qolkii uu Axmed deggenaa, isna markiiba waa ka furay oo inta gacanta usoo taagay yiri;-" Hooyo macaan ma nabad baa?"

Inta dharbaaxo u baacisay ayey ugu jawaabtay;-"War hana hooyeysan caasiyohow yari, waxaad nagu noqotay abeeso aan korsanaye, meeshaan wax tarkaaga ka sugaynay miyaad waxyeello nagu bilowday. Annaguna har iyo habeen waxaan ku fekereynaa sidaan mustaqbalkaaga ku dhisi laheyn, adna lugooyadayadaad intaa faraha kula jirtaa heeryadii cune yohow....."

Axmed oo og meesha sartu ka qurmeyso baa inta dib u gurtay oo wuxuu yiraahdo garan waayey hoos eegay. Hooyo Cowralla oo jawaab ka sugeysay baa inta si fiican kursi meesha yiil salka ugu ballaarisay cannaan kulul indhaha uga shubtay Axmed, tirina;-"Haddii aad badda gel geli laheyd iyo haddii aad cirka aadi laheydba Basra uunbaa ku sugeysa, ee laba ayey mid noqon, inaad anagoo dhan naga go'do oo raacdo gabadhii xumeyd ee bacowda keynmadowfa aheyd iyo inaad Basra guursato.."



Cowralla galabtaa cannaan iyo goodi lama harin, Axmedse wuxuu inta badan daneynáyey inuusan bashimihiisa mar qura kala furin, isha ayuuna ka mirigmirigsiinayey. Markii ay aragtay ineysan waxba uga qaadeyn xanaaq iyo kuleyl ayey waano iyo la talin u gashay. Ugu dambeystiina Axmed wuxuu ugu soo celceliyey hooyadii in haddii waxkale iska daaye geeridiisa iyo noloshiisuba ku xiran yihiin Basra guursigeeda uu intuu axdiga uga bixi lahaa Layla doortay in halakulmowdku nafta ka hor qaado.

Cowralla oo la yaaban go'aanka iyo wadax adeygga wiilkeeda ayaa tiri;-"Hooyo ma waxaad naga dooratay gabadhaa xun..." iyada oo weli hadalkii wada ayuu ka dhex galay oo yiri;-"Hooyo macaan cay kaama mudna ee wax iskula har. Haddii aan caawa dhinto hooyo iyo aabbe adinkaan idin sababsaday, haddii aan noolaadona kolleyba intey iga maqan tahay silic baan ku noolaan doonaa."

Hooyo Cowralla oo naxsan ayaa so dhakhso ah ula soo booday;-"Bismillaahi Raxmaani Raxiim. War bal hooyo kaadso; ma heerkaasay kaa joogtaa, maandhoow si aan yeelo ma aqaane isug bal aan odeygii ku noqdee aniga iyo isagaad isu kaaya wadaaye " oo inta maosalaameysay iridda ka baxday.

Axmed wuxuu ogaa dhibaatada kasoo soocta haddii hooyadii la soocdsiiso aabbihii go'aankiisa iyo sida wa x u dhaceen. Wuxuu rumeysnaa inaan kolleyba marna loo babbo dhigi karin aabbihii X. Ciise oo uu ogaa markuu xanaaqo inaysan tiisa mooyee tu kale maqleyn, markaasaa feker hor leh iyo calool xumo dhameysaa.

Kusoo noqoshadii aqalkooda:
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Axmed oo ahaa wiil dabeecad macaan, karti iyo adadeyg loo daayey, wuxuu intuu waayey gacalisadiisii Layla isu bedelay mid tabarr daran, wahsi badan, had iyo jeerna fekera. Gurigoodii iyo waalidiintiis ayuu u arkay gole cadaabeed iyo iney ku dirqinayaan wax a ysan niyaddu rabin.

Inkasta oo uusan heyn wax shaqo ah, iskoolkuna uu ka xiran yahay wuxuu Axmed isku mashquulin jirey gelitaanka filimada, halkaas oo uu habeen walba waqti da dambe usoo hoyan jirey guriga.

Maalintii ay Layla dhooftay waxaa kasoo wareegatay muddo bil ku dhawaada, welina midkoodna kan kale kama helin wax wara, sababtoo ah midkoodna ma laheyn santuuq boosto ama meel kale oo caana waraaqahana loogu sco hagaajiyo. Markaa waxaa war kala helidoodu ku



xirneyd hadba sida ay u kala helaan qof kan kale yaqaan.

Markuu Axmed muddo bila nolol kalinimo ah ku noolaa ayuu habeenkii dambe sidii caadada u aheyd fur is yiri qolkiisii, mise warqad ay ku qoran tahay far waaweyn ayaa albaabka ku dhegan, inta fujiyey ayuu dhanka ifiinka la aaday " alla waa aabbihii X. Ciise oo leh: Waxaad gaartay bey ila tahay isku filaasho, wuxuu caqligaagu ku siiyey in mar haddii aad xoogeysatay aad naga maara-nto.

In kabadan labaatan labaatan jeer ayaan aniga oo da'daasa kusoo raadshay oo aadan mar qura waxaan ku nool nahay adna nasoo eegin. Berri shanta galaknimo yaanan kaa weyn guriga haddii aada n wax kale dooneyn, waa aabbahaa X. Ciise."

Inta warqaddii isku laalaabay oo jeebka shaatiga xaluushay buu iska seexday. Waalida caasinimo iyo ballan furyo midna laguma aqoone galabtii dambe waqtigii aabbihii u qabtay buu sugay isaga oo is leh;- "Kolleyba wax cusub maahee wuxuu aabbahaa kuu wadaa wax aysan naftu oggolaan karin."

Axmed wuxuu deggenaa guri cabbaar u jira aqalkooda oo maadaama gurigoodu ciriiri ahaa isna uu curadka reerka ahaa aabbihii qol uga ijaaray.

Shantii galabnimo iyo daqiiqado markey saacaddu aheyd ayuu X. Ciise oo baabuur TOYOTA wataa albaabka hoonka ugu dhuftay, markii laga fureyna inta gadaal gadaal usoo geliyey buu ku calaqay iriddii qolkii Axmed degenaa. Axmed oo kusoo baxay guuxa gaariga iyo codka aabbihii oo uu dareemay waxaa u cadaatay arrinta uu wato aabbihii, isagoon wax hadal ah oran.ayuuna bulaabay inuu alaabtiisii ku raro gaarigii.

Markuu alaabtii ku dhameeyeyna X. Ciise siduu ula sii duulayey ,ayuu iridda ka joojiyey aqalkoodii, qol ay mar hore hooyo Cowralla sii banneysayna alaabtii lagu daldalay.

Markuu degay ee uu Axmed alaabtiisii kala hagaajistay ayey walaashii Nasra usoo dhigtay koob shaaha, inta laba jeer kabaday buu iska baxay aadayna shineemo.

Laba kala daran midkee doortaa !!!!
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Axmed wuxuu awoodda saaray siduu uga maadan lahaa aabbihii oo uu hubo inuusan qowlkiisa jabin karin, hadduu jabiyana uu faraqa ka buuxsan doono habaar waalid iyo deyro, taas oo uu rumeysan yahay iney hoog ku noqon doonto aayihiisa dambe, hase yeeshee taasi uma suura gelin ee laba maalmood ka dib aroornimo Isniina iyadoo Axmed loosoo dhigay quraac buu X. Ciise dhinac kasoo fariistay hadalna uga bilaabay:-"Maxaad ka damacday Axmedoow xaajadii aan isku ogeyn?



Axmed oo su'aashaasu uga darneyd fallaar mariideysan oo halbowlaha wadnaha lagaga hubsaday ayaa inta hoos fiirshay oo cabbaar aamusnaa si asluub iyo ixtiraam waalidnimo ah u yiri;-"Aabbo sida aad la socoto waxaan ku jiraa xilli waxbarasho, waxaanna jecelahay inaad aqoonteyda ilaa heer wado. Marka aabbo inaga oon waxba idin ka diidayn waxaan idin ka codsanayaa in waqti la i siiyo oo intaan waxbarashadeyda ka dhameysanaayo la i sugo."

X. Ciise oo ay ka muuqato saluugid uu saluugayo jawaabta wiilka ayaa lasoo booday;-"Oo maandhoow maxaad ka qabtaa haddii aan hadeer adiga iyo Nasra isku kiin mehersho, intaad waxbarashadaada inta ka dhameysaneysona aan idiin sii diyaarsho waxaad ku aqal gali laheydeen, oo hadhoow iyadoo wax waliba diyaar yihiin howl kayaan ku guri gashaan?"

Axmed oo sidii wax ku margadeen candhuufta liqila' baa niyadda iska yiri;-"Runtaa ilaahay kugu jecel yahaye haddii aadan gabadhaas dooneyn maad hadeer aabbo xaqiiqda farta ka saartid, wixii ka dhici lahaaba ha ka dhaceene..Ilaahayoow wax san afkiisa ka yeersii;" oo inta geesinimo iyo indho adeyg iska baaray yiri;-"Aabbo ma run mise been, runi waxay tahay in haddii aan kun sano

jiro oo dumar ho dhan Basra kasoo harto aan mamma laga yaabin iney oorideyda noqoto.

Ouursigeeda aabbe gedka aakhiro inaan galaan ka doortay ee aabbo, aabbo maoaan ha i qasbina."

X. Ciise inta qosol aan heyn dheola oadeeyey, madaxana ruxay, oo inta misna wejiga kaduuday indhahana galka ka jiiday, miiska gaoanta ku garaacay kuu isaga oo aad u oareysan ku dhawaaqay;- " Waryaa maxaad tiri...Maxaad isu maleysay?..Yaa..Kibirkaaba anaa keenay ee labo kala dooro, inaad gurigaas waxaad ku leedahay kala soo baxdo hadeer, habaa r iyo deyrana aad faraqa ka buuxsato iyo inaad qasab ku guursato Basra...Waryaa ballan ayaan anigu dad waaweyn ka qaaday, sidee qowlkeyga u jabin kartaa? Yaa.....!!!

Axmed oo aad u khushuuoosan daneynaya na in aabbih go'aankaas ka noqdo baa ood qaboow ku yiri;-"Aabbo ii daaya aan ku dhaqmo garashadaydoo...Aabbo maadaam aan laga yaabin iney Basra oorideyda noqoto sida aan looga yaabin in hadda dib la iigu oosho riximkii hooyadey waxaan kun jeer kaa dalbanayaa inaad go'aankaas ka noqoto. Haddii taasi suurtagal noqon weydo iga ma fursaneyso aabbe inaan nolosheyda inta dhiman ku noolaado silic iyo saxariir."



X. Ciise inta istaagay kuu isagoo wejigiisa dhidid yar yari qooyey xanaaq awgii yiri;- " Hih..Hadalba wuxuu ku og yahay, waxaan ku siiyey 24 saacadood oo aad kaga soo fiirsato kii kuu roon laba: ( habaar iyo deyro ama Basra oo aad guursato), goortaan goorteeda ayaan rabaa jawaab kama dambeysa..Yaa..Muxuu yiri? X. Ciise oo oaro darteed albaabka kusii dhuftay garabka ayaa inta soo jeestay haddana yiri;- " Wiilyahoow waxaan kugula talinayaa inaadan mustaqbalkaaga baabi'in oo aysan balaayo kuu hargo lulin ee aashaa soco " oo horo usii dhaqaaqay.

Hooyo Cowralla oo soo raaoday qeylada odeyga oo albaabka taagneyd balse aan ku dhicin iney wax hadal ah meeshaas ka geysato ayaa inta il naxariiseed kusoo eegtay ouradkeedii Axmed oo sidii cirku kusoo dumay dhafoorada haysta weliba dul hoganaya miiskii, damaoday iney la hadasho, hase yeeshee markey aragtay imuu aad u kaosan yahay uusanna u baahneyn wax laba ayey inta albaabkii usoo riixday ka dhaqaaqday.

Run ahaantii haddii uu awoodi kari lahaa Axmed imuu u duulo sida shimbirka, malaha wuxuu iska tagi lahaa jasiirad waaqle ah oo wax bani'aadama ahi aysan ku nooleyn inta waqtiga iyo nasiibku uga saamaxayoan iney is oalfadaan tii miyir qaaday Layla; si uu u weheshado dhirta iyo dugaagga ugana dheeraado dhibaatada iyo makriga insaanka.

Wuxuu dib u xusuustay waqtigii soo maray iyo waayi- yihii dahabiga ahaa, waxaa hadba hortiisa yimaada, maalmihii sacaadada iyo faraxa ee isaga iyo Layla. Wuxuu hadba milicsadaa waqtiyadii samaha badnaa, ee ayaamihii isbarashadooda, qisadii isu keentay iyo taariikh nololeedkii Layla oo marka uu soo xusuusto ku dhalisa murugo iyo calool xumo dheeraada. Naf- ta ayuu ku sababay oo u sheegay iney samir yeelato, sugtana xilliga nasiibkeedu samaan doono taasoo uu hubo inuu mar uun gaari doono haddii eebbe ka raalli noqdo.

Markuu in muddo ah yaxoobay meeshii aabbihii kaga tagay buu isaga oo aad moodid in ruuxiiba laga siibay inta kabihii iska bixiyey tiigsaday sariirta. Wuxuu sameeyuu garan waayey, wuxuu la ikmeeyey ciil, 24 saacadood oo tashi inuu go'aan gaaro ah ayaa la sii- yey, laakiinse uga daran isaga inta dunida ka hartay oo uu ku noolaado rafaad haddii xataa cimrigiisa loo daayo.

Intuu dib isugu noqday ayuu damcay inuu bal raa- dis dheer u galo siduu kusoo heli lahaa furaha xa- llinta arrintan. Wuxuu awoodda saaray isku taxalujin- ta siduu xijaabka badbaadada u dhex dhigi lahaa dab iyo baasiin labadaba uusan ka maarmin oo noloshiisu ku xiran tahay.



Siduu hadba dhan sariirta ugu galgalanayey ayaa la gaaray xilligii qadada, markuu qadeeyey buu beegsaday meel firaaqo ah ee ka fog shanqarta iyo saanta dadka, si uu go'aankii uu aabbihii la hor tagi lahaa ku gaaro.

Oo muxuu sameyn? Muxuuse sameyn karaa? Ma ka bixi karaa cahdigii iyo ballantii adkeyd ee uu la galay midda ku beeran xubin kasta oo ka mida jirkiisa, mase ka bixi karaa!! Ma u bareeri karaa inuu ka go'o waalidiintiisa qaaliga ah, shalay isaga oo awood leh shaqeysan kara, waxna jeclaan kara buu is arkaye kuwuu sababtooda koonkan ku yimid oo ilaa maalin- tuu xab iyo biyo ahaa sacabada ku waday miyuu ku caasin karaa!! waa laba kala dar-ane midkee doortaa, kee buuse reebaa!!!!!!!!!!!

Markii la gaaray xilligii ballanta Axmed wuxuu aabbihii u sheegay inuu aqbalay go'aankaas qasabka ah, balse wax kasta haddii la sheego uusan guursaneyn ilaa uu dhameeyo Jaamicad.

Dood dheer ka dibna X. Cise wuu ka yeelay Axmed arrinkaas.

## QEYBTA 2aad
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Barbaarin fiican baa u horeysay!/

" Waa rajo oo malaha hooyo, waana agoon oo aabbeheed mar horuu xijaabtay. Layla walaalo ifka ku weheliya nasiibku uguma deeqin hadda, madina ma aheyn ee, waxaa mucjisooyin layaan leh tusay hagardaamooyinka waaya ha kuna kaliyeeyey dunidan....."

Waa qoys caadiya oo heer fiican ka jooga nolol maalmeedkooda. Warsame, Layla aabbeheed waa shaqaale qaata mushaar ku filan nolosha qoyskiisa. Cibaado, Layla hooya deed ma hayso wax howla aan ka aheyn shaqada gurigeeda.

Waxay dhaleen saddex carruura oo ay u barbaariyeen si wanaagsan, waxaa ugu weyn Layla oo markaa 11 jira iyo Cabdi iyo Aniiso oo 7 iyo 5 sano kala jira.

Wuxuu ahaa qoys ku daya sho mudan, waxaa ka dhexeeyey xubnaha qoyska is maqal, wada shaqeyn iyo kalgacal, waagii beryaaba wuxuu u ahaa mid u fura waddo hor leh oo ku hoggaamisa ayna u maraan jidka nabadda, kheyrka iyo sacaadada.



Warsame, Cibaado iyo saddexdooda carruura waxaa guriga ku weheliya ayeeyo Ceebla', Cibaado hooyadeed. Islaantu inkasta oo aysan sidaa u da'weyneyn haddana waxay aad ugu rugushahay cudurro badan. Waa jirrooley in ka badan saddex jeer sannadkii aad loo qabto.

Layla waa curadda reerkee waa gabar aad u firfircoon, akhlaaq wanaag iyo edeb lagu ababiyey, aad u karti iyo dedaal bada n. Jacaylka iyo muxibada waalidku u hayey gabadhaa malaheyn xad. Warsame wuxuu markasta isku taxalujin jirey siduu doonista iyo fikradaha gabadhiisa uga dhigi lahaa kuwo fula.

### Waxay gashay Isbitaal:
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Habeen Sabtiya ayaa aad loo qabtay ayeeyo Ceebla' taas oo sababtay in la seexsho isbitaalka guud ee Digfeer. Intii islaantu isbitaalka jiiftay waxaa ka warqabkeeda si joogto ah ula socday Warsame, maadaama Cibaado ay ku mashquulsaneyd howsha guriga xaamilana aheyd.

Laba toddobaad markii ay jiiftay isbitaalka ayay maalintii dambe Warsame oo ugu yimid isbitaalka usoo jeedisay:- "Hadda waan ladanahay oo ilaahay mahadii

saafimaadkeygu waa roon yahay laakiin takhtarka ayaa ii sheegay inaan toddoba beri oo kale halkan sii joogi doono inta aan si fiican uga bogsanayo. Marka waxaan si aada u jeclaan lahaa in aad gala ta isoo tustaan ilmihii wax la noqom doono lama ogee."

Warsame oo cududaaranaya rabana inuu islaanta u sheego inuusan galabta taa awoodin ayaa si xushmad iyo akhlaaq wanaagga u yiri;-"Eeddo maanta iyo berri oo Arbaco ah labadaba waxaan leeyahay shaqooyin adag oo aanan ka baaqan karin subax iyo galab midna; laakiin haddii alla idmo galabta Khamiista oo aanan shaqo laheyn baan kuu wada imaaneynaa kulligeen ee galabta i fasax."

-Waxba kama qabo ayey iyaduna ugu war celisay.

Seken weliba wuxuu ku gudbay si cajiiba; saacad waliba saacad ayey xumaan iyo samaan wixii eebbe u qadaray ku sagootisay. Waxaa soo dhawaatay waqtigii hoogga ee qoyska Warsame. Daqiiqadii soo martaaba waxay soo dhaweyneysay halaagooda, waxaa la gaaray maalintii Khamiista ee ballantu aheyd in reerka oo dhami soo hooqdo ay. Ceebla'.

Galabnimadii markii Qorraxdu qabowday ayey qoyskii oo dhan tagsi ka raaceen waddada si ay ugu gal-



-badaan isbitaal Digfeer iyo ayeeyo Ceebla'. Waxay balleeyeen iyada oo qudheedu sugeysay ogeydna in galabtaa loo imaanayo. Durbadiiba waxaa ku xoomay saddexdii ilmood oo ay ayeeyada u aheyd, gaar ahaan Layla oo awalba si xad dhaafa u jecleyd ayeydeed sidey usii duuleysay ayey dhunkasho labada dhaban dhowr jeer uga dhiibtay, labadii yaryareydna inta ku deydeen bey ayeydeed meel walba ka dhunkadeed.

Warsame iyo Cibaado oo ku faraxsan baarinimada ilmaha ayaa iyaga oo dhoola caddeynaya isku mar yiri;-"War ka taga ayeydiin way jirran tahaye ha dhibininee."

Labadii yaryareyd markii ay maqleen hadalkaa waalidkood bey dib uga istaageen, laakiin Layla weli waxay ku nabneyd dhabta ayeydeed, waxaadna moodeysay dhab ahaan iney ka tan badisay muxibada ay u qabtay ayeydeed.

Ayeeyo Ceebla' inta fiican u fariisatay oo madaxa u salaaxday Layla oo weli dhabteeda ku dhanbacaadda ayey niyadda iska tiri;-"Baarisanaa ilaahay igama kaa qaado, cimrigeeda allahayoow cimri ugu dar....."

Warsame baa su'aalay Ceebla' "Sidee hadda xanuunkii ka tahay? Meeqa beri baase kaaga dhiman waqtigii aad isbitaalka kasoo bixi laheyd?

-" Wallaahi ha dda aad baan u ladanahay walow aan xoogaa xanuuna dareemayo, waxaana ii haray afar beri waqtigaan kasoo kixi lahaa isbitaalka" bey ayeeyo Ceebla' ku jawaabtay.

-Layla;- " Ayeeyo waad lada n tahaye maad na raacdid, maxaad isbitaalka joogitaankiisa ku faleysaa?"

-Cibaado;- "oo intii aysan Ceebla jawaabin hadalkii qaadatay baa tiri;- "Hooyo takhtarka ayaan u ogoleyn ilaa caafimaadkeedu aad u wanaagsanaado iney isbitaalka ka baxdo."

Waxaa la gaaray xilligii qoyskii reer Warsame ay u noqon lahaayeen gurigoodii. Markey islaantii nabadgelyeeyeen oo ay damceen iney baxaan ayey Layla inta gaca nta midigta ah ku dhegtay ayeydeed oo dhunka sho u dhiibtay dhowr jeer si diiran u tiri;- "Ayeeyo macaan inaan oaawa inaan kula joogaan rabaa oo tagi maayee u sheeg aabbe iyo hooyo."

Ay. Ceebla' ayaa tiri;- "Ayeeyo maxaa i cunaya oo aad iga ilaalineysaa? Waxba igu dhici maayaane orod ayeeyo aabbe iyo hooyo raac."

Murankoodii ayaa waxaa ma qla y Warsame, markaasuu inta kusoo noqday yiri;- " Abbo maxaad isbitaalka ugu dheggan tahay? Nakeen haddii aad rabto anaa subixii



kusoo wadayee oo kuu keenaya ayeeyee."

-Ayeeyo Caable' ayaa iyaduna inta gacanta Layla kor u qaada y tiri;- "Ayeeyo ma dhego adeyg baad baratay kac oo orod aabbo raac anigu waan caafimaad qabaaye."

- Layla inta istaagtay oo aabbeheed kor u laacday bey labada dhaban ka dhunkatay oo si aad u qabow u tiri;- "Aabbe macaan inaan oaawa ayeeyo la joogo baan gooostaye aabbe idaa!!!!! "

-Warsame isaga oon kalmad kusoo celin buu isagoo raaliya ka dhaqaaqay. Wax yar ka dib na reer Warsame oo Layla ka maqan tahay waxay tagsi ka raaceen barxadda weyn ee isbitaal Digfeer, si ay gurigoodii u soo aadaan.

Illeen malakulmowdku isuma kaa sheego! Yaa u tabiya in gabadha yar ee Layla ka qumaneyd markey diidoyeay raacidooda. Illeen ruux aysan tiisii gelin ma dhinto.

Waxaa wareegay shaagii geerida:
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Waxaa horey fariistay Warsame, Cibaado iyo labadeedii ilmoodna waxa y galeen gadaal. Waxaa wareegay shaagii geerida, ta gsigiina waa dhaqaaqay. Waxaa marba marka ka dambeysa si xowliya usoo siqeysay daqiiqadii baaba'a iyo burburka qoyska Warsame, Layla maahee.

Waxay soodaahba, wax Warsame iyo Cibaado ay ka dоodaan fulinta arrimo badan oo kusoo fool lahaaba, waxaa mar kaliya is maqli waayey Warsame iyo Cibaado oo sheeko u soootay markii maqalka dhegeho... odu soo jiitay cod dheer oo ka baxayey iskaalmiintada tagsiga ka dib markuu waduhu cagta ku cadaadiyey sheellaraha, sababtoo ah wuxuu soo saarayey daloadda dheer ee daadegga dabka ee M. Muqdisho. Waxaa markaas in ka yar 1000 tallaabo loo jiraa gurigii ay ku sodeen.

Markuu tagsigii qiyaas aan dheereyn u jiro isgoyska Dabka ayaa...ayaa waxat la mulmeen wax aysan fileyn, waxaa ku dhacay argagax iyo filan waa, wadihii wuxuu xukumi waayey gaarigiisii; jidkii baa ciriiri la noqday; wuxuu ku guuldareystay helitaanka goob uu ku badbaadiyo naftiisa wax kaleba ha joogeene.

Dalcadda kore e e wadada ka timaada iskuul Boliisiya, soo kor marta buundada labaad ee suuqa Ansalooti ee magaalada Muqdisho marka laga yimaado dhanka bari ayaa waxaa farriinku usoo go'ay baabuur weyn oo Ilji ah, xamuul badanina saarnaa. Wuxuu si xowli ah uga soo daadegay dalcaddii, markuu isgoyska dhankiisa shishe marayo, tagsiguna qumaati ugu abbaaran yahay ayuu wadihii tagsigu dareemay in gaarigaa-



-si uusan farriin laheyn.

Kama gaaro waqti uu seed weyn u banneeyo; mana awoodi karo inuu gadaal u cararo. Wuxuu damcay inuu dhanka bidix isugu bato, hase yeeshee nasiib darro waxaa ku yimid kii oo isna damcay inuu dhanka midig uga beyro. Maxaa dhacay dabadeed!!!!!!!!

Maadaama meeshu aheyd dalcad, baabuurku uu ahaa mid weyn, waliba raran, uuna ku socday xawaare dheeraada; inta uu dul qaaday ayey labadiisii lugood ee dambe taako ka dhigteen qaarkii dambe ee tagsiga. Waxaa sida roob mahiigaan ahi helay wadada qulqulay dhiig, waxaa markiiba meeshii isugu yimid boqollaal qof, balse maxay qaban karaan? Tagsigii wuxuu noqday koombo, rakaabkii saarnaa wax hadal ah oo kasoo yeerayaa ma jiraan, waxayna galeen aamusnaan dheer.

Markiiba waxaa telefoon laga direy sarta dheer ee Dabka, daqiiqado ka dibna waxaa yimid gurmad, waase g oorma? Waa waqti wax waliba u dhaceen sidii eebbe ugu tala galay?!!!

Warsame, Cibaado iyo labadoodii ilmood mar horey naftu deysay, tagsiilihiina waxaa ku jirta naf yar, si dog dega ayaa loola cararay isbitaal, nasiib darro intii la sii waday ayey naftu ka baxday isagiina.

Habeenkii Jimcuhu soo galaye y ayey qaboojiyaha Digfeer ku baryeen Warsame, Cibaado iyo labad-oodii caruur ahaa iyaga oo aan la garaneyn maga-cyadood cyadooda, maadaama aysan wa dan wax aqoonsi ah.

Geeska kale waxaa iyaguna isbitaalka jiifa ay-eeyo Ceebla' iyo Layla oo gala bnimadii hore laga kari waayey iney raacdo hooyadeed iyo aabbeheed. "Illeen ruux aysan tiisii ge lin ma dhinto.!"

Waxaa la gaara y 10:00kii subaxnimo ee subax-nimadii Jimcaha, Layla iyo ayeeyo Ceebla' waxay sugi la'yihiin oo ay daahsadeen imaatinka Warsa-me oo subax walba aroortii kusoo kalihi jir ey isbitaalka. Laylaa tiri;- "Ayeeyo saaka maxaa aabbe ku dhacay?"

- " Ma aqaan aye eyo, malah/saaka waa Jimce oo waxay ku daaheen hurdada."

- "Ayeeyo taasi ma dhici ka rto oo weligiis aa-bbahay markuu salaadda subaxa tukado ka dib hurdo kama kuma noqon." bey Layla kusoo celisay ayeydeed.

-Iyagoo weli hadalkii isku haya ayuu albaabka ka-soo galay X. C/raxmaan oo a y reerkooda deris ah-aayeen, wuxuuna duqdii u sheegay in reerkii dhamaa ee shala galabb markii oid ugu dambeysay isbitaal-ka soo aada y aysan qofna ilaa hadda ka a rag, xa-



-la yna gurigii soo seexan.

-Ayeeyo Ceebla' intey xoogaa naxday oo soo is-taagtay bey tiri;- " Maxaa ku dhaca y walaalow? waa kuwii shalay naga tagaye?

-Oo isagu ma ku war dhaamaa, isba wuxuu raadina-yey waxa ku dhacay reerkiiye. Inta duqdii usoo jeestay buu su'aala y;- "Oo miyeysan Layla raa-cin shalay markay kaa tagayeen?"

-Maya oo anaa la iga ag dhaqaajin waayey, tolow maxaa la degay oo ku dhacay qoyskii?

-"Oo miyaan aqaan, anba waxaan raadinayey meel ay jaan iyo cirib dhigeene, waxaana noogu dambeysay, markey adiga kusoo aadeen shalay."

Ayeeyo Ceebla' waxaa ku dhacay argagax, waxaa gala y dareen, waxa y sameyso bey garan weyday. M-arkey oabbaar meeshii taagneyd bey inta u carartay ta khtarkii daaweynayey xagiisa oo arrinta dhacday la socodsiisay tiri;- " Ditoore hadda aad baan u la-danahay, arrimahaasina way dheceen, marka waxaan si ra xmad Ich kaaga codsanayaa inaad wixii daawo aan u baahanahay inta ii qorto i fasaxdo isla hadda maadaama gurigii cidla yahay.

Intuusan u jawaabin ayaa waxaa xafiis garabkoo-da ah kasoo baxay Aggaasimihii Guud ee Isbitaalka oo yiri;- " Ditoore, dadkii shala galabb shilka

ku dhintay ma jiraan weli wax aqoonsaday ee u yimid?

-Jaalle Aggaasime maya, buu si xushmad leh u yiri!

-Ayeeyo Ceebla' baa niyadda iska tiri;-"Alla amaan hoogay oo ba'ay oo dadkaasi yihiin iyagii, alla ka ma dhigee." Oo inta ditoorkii usoo jeesatay si dhaqso ah u tiri;-"Maxay yihiin ditoore dadkaasi? Meeqa meeqayso dhamaayeen? Goormeyse shilka galeen?"

-Ditoorkii oo qudhiisa shaki galay baa yiri;-"Ee-ddo dadka kaa maqani waa imisa qof? Maxayse kala ghaayeen?

"Waa afar qof, laba caruura iyo waalidkood, shalay ¶ shantii galabnimo baa noogu dambeysay iyaga oo ka tagay isbitaalkan, xaafadiina ma tagin oo waa la la'-yahay weli " bey duqdii lasoo booday.

-Wejiyadooda magarn laheyd haddii aan ku tuso.

-Inta labada gacmood kor u qaaday bey mar qura tiri; "Haa Ditoore, maxaan u garan waayey waa ikmaheygiiye."

Illeen takhtar ma naxo, siduu ula sii duulayey ayuu balleysiiyey qolkii meydka. Mise..Alla qaraxan weynaa waa reer Warsame dhammaantood Layla maahee oo meyd ah. Geeridooda waxaa ka darneyd silica iyo sida jirkoodu u burbursanaa.



Duqdii inta qabowday oo labadii indhood soo baxeen naxdin awgeed bey afkii kala qaadi weyday, si hoosena iyada oo dhulka kusii hoobaneysa u tiri;-"Alla tanina ma ii dambeysay!!!!!!!

Takhtarkii inta gacanta qabtay islaantii oo bannaanka u saaray buu in ka badan 3C daqiiqo waano iyo caqli celin ugu waday.

Ceebla' inta u khushuucday waanadii takhtarka ayey usoo carartay xaggii qolkii ay jiiftay, oo inta wixii alaab ka yiilay ka uruursatay ula orday gabadhii xagga iyo gurigii.

Warsame, Cibaado iyo labadoodii ilmood waxay u hoydeen duni kale, waxaana lagu aasay qabuuraha Jeneraal Daa'uud ee M. Muqdisho. Ayeeyo Ceebla' inkastoo ay markii hore ku dedaashay iney gabadha yar ka qariso geeridda qoyska haddana wuxu ka weyn wax la qarin karo oo deriskii iyo dadkii taosida imaanayey oo wada hadal haya markey aragtay bey Layla xaqiiqsatay iney waayuhu guuldarooyin badeen.

Waxaa martay maayad la ciireysa xusuus murugo iyo tiiraanyo. Saacado badan bey hadday baroori wax tareyso ka dul ilmeyneysay sariirta. Illeen qof dhintay dunida kuma soo laba jeer noqdo!!!!!!"

Taageero hagarr la'aana buu siiyey:
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Dhibaata d ii la deristayy Layla waxaa laga ogaaday iskoolkii oo dhan. Waayihii nolosha aabbeheed iyo hooyadeed waxay aheyd tan xagga waxbarashada u haysata fasalkeeda, taas oo ay ku murteysatay iney marar bada n ka gudoonto maamulaha abaalmarino badan.

Layla markii musiibadu la deristay waxay jirtey 11 sano, waxayna dhiganeysay dugsiga hoose,fasalka afraad.

Axmed oo ahaa horjoogaha fasalka ay Layla dhigato, isku kursina ay ahaayeen waxaa isaga iyo Layla ka dhexeeyey tartan xagga aqoonta, wuxuu dhowr jeer isku ciil kaambiyey awood daridiisa uu mar qura kaalinta koowaad ka geli waayey gabadhaa. Laakiin markan waxaa Axmed qaracan ku riday ayaandarrada haleeshay Layla. Wuxuu awoodiisii oo dhan isugu geeyey siduu weji naxariiseed iyo walaaltinimo dhabaugula dhaqmi lahaa Layla. Wuxuu kasoo dhaweystayy ardeyda intoodii kale ilaa heer la su'aalo;- "Axmed, Layla maxaad isu tihiin?" Asna ugu jawaabo waa walaashay oo habaryartay baa dhashay.

Layla qudheedu inkasta oo a y markii hore aad uga digtoone yd, oo ay moodeysay inuu khiyaamoo-



-yin iyo wacdare la da maosan yahay haddana markey dhab ahaan u ogaatayy inuu yahay daacad aan walaaltinimada looga shisheyn ayey kalsooni buuxda ka qaadatay. Waxay isla dhaqmeen ilaa la moodo laba naas hooyo wada muugay, xagga is ixtiraamka iyo is xaqdhowrka wuxuu midha kan kale u han weynaa intii la doono.

Waxa ay iskoolka uga baahan tahay buug,qalin, dharka iskoolka iwm sid uu baahideeda og yahay buu uga sii qaadaa dukaanka aabbihii. Xilliga bareegga ma aadi jirin baarka iskookka inuu gaca nta sii qabto mooyee. Sannad dugsiyeedkasta dharka iskoolka iyada oo aan xilligii furitaanka dugsiga la gaarin buu u keenaa...

Axmed taageeradiisii kuma ekaan fasa lka ee wuxuu awoodda saaray siduu kusco baran lahaa nolosha dhabta ee Layla iyo gurigoodaba. Layla waxay marar badan ayeydeed uga sheekeysay ixsaanka qaaliga ee uu u galay wiilkaasi. Waxay tiri;- "Ayeeyo uma maleyneyn weligey inuu ragga ku jiro shakhsi sidaa daacad muumina u ah. Waxaan ayeeyo boqol jeer iyo ka badanxaqiiqsadayy iney taageera diisu tahay mid aan dan gaar ahi ka dambeyn; waxaan dareemay inuu ii hayo walaaltinimo daacada oo aan xad laheyn.

Islaantii Ayeeyo Ceebla' oo u haysa inankaa ix-

-saan weyn, una ooman aragiisa ke dhowr jeer Layla ka codsatay iney soo tusto wiilkaa kheyraad ayey maalintii dambe isa soo raaceen Axmed iyo Layla, soona aadeen guriigii ay Layla ku nooleyd. Duqdii markii ay aragtayba waxay usoo dhaweysay si cajiiba, waxayna dhowr jeer ugu soo celcelisay Axmed inuusan maanta wixii ka dambeeya marti ka aheyn gurigan ee uu yimaado xilli kasta oo uu heli karo.

Waxaa dhamaaday toddobaadyo, waxaa is dhaafay bilo, waxaana isa sagootiyey sanado. Axmed wuxuu noqday mid saddexeeya qoyskii ay Layla iyo Ceebla' ku noolaayeen.

Bilba tan xigta ayuu faqrigu kusoo kordhayey reerka, noloshoodii oo dhan baa waxay noqotay mid hooseysa, sababtoo ah islaanta Ceebla' waxay aheyd duq gabowgu fara baas ku hayo, Laylana ma shaqeysan karin oo iskoolna way dhigan jirtey guriga howshiisana kali bey ku aheyd, weliba ay u dheereyd duqda oo xanuun jcogto ah qabtay. Marka wixii ka haray xoolihii aabbeheed ka dhintay ayey maalinba in la soo baxaan ilaa ay ka welwelaan noloshooda mustaqbalka.

Waxaa bil qurahi ka hartay waqtigii Axmed iyo Layla u fariisan lahaayeen imtixaanka kama dambeysta ah ee shahaadada Dugsiga Dhexe. Maalin



iyaga oo ku dhex sheekeysanaya fasalka buu Axmed su'aalay Layla;-"Horta wallaal haddii aan imtixaanka ku baasno dugsigee qoran laheyd?"

Laylaa ugu jawaabtay;-"Abboowe Axmed kolleyba anigu kuma talo jiro inaan waqtigaaga sii dhigto dugsi Sare ee waxaan jecelahay inaan iska shaqeysto oo moqdo macallimad P.P. ah"

Axmed oo ay ka muuqato inuusan jawaabtaas ka fileyn baa lasoo booday;- "wallaal maxaad ku diideysaa waxbarashadaada, miyaadan ogeyn in cilmiga aan laga dhergin, wax lagu doorsadaana aysan dunida jirin. Abbaayo, maxaad ugu degdegeysaa durba inaad waxbarashadaada halkaa uga harto?"

Layla:-"Axmed horta maxaad abboowe isaga dhigtaa sida qof aan waxba ogeyn, waxay ila tahay taqliin qof iga jeclaa inuusan jirin, hadduu jirana ma badnaeyn, waxa igu kallifaya inaan shahaadadeyda Dugsiga Dhexe isaga shaqeystana adba waad ogtahay oo wallaal waxaad la socotaa in wixii aabbahay ka dhintay ay dhammaadeen ama dhamaad yihiin.

Aniga iyo ayeydey maanta waxaan ku nool nahay nolol faqri ah; run ahaantiina kaalmadaada la'aanteed waqti horeba nalama arkeen. Tan kale abboowe ayeydey waa jirrooley waxkasta u baahan; haddaba

ma adigaan har iyo habeen dhib kuula fadhiyeynaa. Waa inaan intii karaankeyga ah shaqeeyaa ka dibna waxaad heli karto haddii ay suurta gal tahay noogu fartaa. Miyeysan aheyn Axmedoow?"

Axmed oo hadalkaasi calool xumo ku abuuray ayey ilmo indhihiisa lasoo wareegtay. Wuxuu dib u xusuurstay xilligii yaraanteeda, sid ii loo xanaaneyn jirey iyo sidii muxibadda waalidkeed ay ugu dheereyd. Waqti hore sida ay ugu dhegeneyd aqoonta, ugu jajabne yd iskoolka, dharkeeda iyo sida ay u labisan tahay ayaa qof kasta oo aan aqoonini ka sawiran karayey inuu kolleyba gabadhaa dhalay waalid muxibadeedu ku dheer tahay, had iyo jeerna ka fekera mustaqbalkeeda.

Illeen waqtigu isuma kaa sheego!!! Isaga oo Axmed weli ku jira xusuustiisii waayihii farxadeed ee Layla ayey inta la yaabtay wiilka waxa jiitay tiri;- "Maxaa kugu d hacay abboowe oo aad la fekereysaa? Ma jawaabteydii baa ku murugo galisay?"

"Axmed oo a ad moodo inuu hurdo kasoo toosay baa yiri;-"Yaa...Maxaa tiri wallaal?"

Layla oo garatay inuu dabaalanayey mowjado xusuusa ayaa tiri;-"Abboowe wax baad i weydiisay, waana kaaga jawaabaye maxaa ku helay?"



-Abbaayo waxba ima h elin ee waxyaabo kale ayaa maskaxdeyda kusoo dhacay. Haddii aan jawaabtaadii usoo noqdo aniga taasi waxay iigu muuqataa khalad, mana doonayo inaad waxbarashadaada ka harto ilaa iyo inta aad ka gaareyso meekhaan fiican. Wallaal waxkasta oo soo socdaa mar uun bey iman haddii cimrigaagu kuu oggolaado. Tan kale ee aad leedahay nolosheyda ayaa igu kallifeysa inaan waxbarashadeyda ka harana; waxaad ogaataa Abbaaye aniga, adiga iyo ayeeyo Ceebla' waxaan wadaagnaa hal naf oo maka la maarana, hadduusan wedku na kala geyn, intaan ifka joogo ee a an heli karo waxaad ku noolaataana qadi meysaan.

Kaalmada aad sheegeyso ee aan idiin taray wallaal waa mid aan isku leenahay. Sow lama socotid ilaaheenna weyni inuu awoodi karo inuu ummaddiisa taajir ka wada dhigo, laakiin wuxuu qani iyo faqiirba u uuntay bal inaan dhexdeenna isu naxariisano ee nama kala jecla, mana habboona walaal inaad mahad intaa le'eg iigu soo jeediso wax yar oon idiin taray maalin...."

Layla oo hadalka ka dhex galeysa baa tiri;- "Abboowe macaan garabka kaliya ee aan maanta adduunka ku haysanno aniga iyo eyeydey waa adiga marka laga reebo Abtigey Guuleed oo jira dhul

naga dheer. Haddii aad igu waamineyso waxbaranaga dheer. Haddii aad igu waamineyso waxbara-
dhadeyda kolleyba taasi waa mid aniga aa roon
oo mustaqbalkeyga haddii alla idmo i anfici doonta, balse wallaal waxaa la yiri;- (Dheriga karka maxaa ka keena?) oo aniga cidina waxbarasho igama heleyne waqtiga iyo waayaha ayaa nasiib xumo igu hayal!!!"

Intii uusan Axmed hadalkii qaadan buu Bare Jibriil soo galay fasalkii, labadoodiina mid waliba inta buugiisii la kala baxay buu isaga oo ay masinta kaxdiisa ka yeereyso doodii ay is dhaafsadeen u diyaargaroobay casharka macallinku bixin doono.

Waxaa la gaaray xilligii ay u fariisan lahaayeen imtixaanka shahaadada Dugsiga Dhexe, waxayna aad ugu diyaargaroobeen gelitaankiisa. Subaxnimo Sabtiya hobaantii Luulyo ayuu imtixaankii bilowday, wuxuuna ku dhammaaday guul. Inkastoo aysan Axmed iyo Layla kubin natiijada ay kala kulmi doonaan marka dabayaaqada sannadkan lasoo dhejiyo imtixaanka haddana waxay ku kalsoonaayeen waxay qoreen. Waxay rajo weyn weyn ka qabeen iney buundo wanaagsan keeni doonaan.



Way geeriyootay iyana !!!
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Ayeeyo Ceebla' mar kasta oo ay Axmed aragtaba waxay faraqa ugu gunti jirtey duco xad dhaafa, waxay ula baxday magacyo badan sida;- Axmed-weli, Axmed-khadar iwm, iyada oo u haysata in wiilkani yahay addoon ilaahay usoo direy markuu dadkoodii dhaafshay. Waxay marar badan kula dardaarmi jirtey Layla ineysan abaalka wiilkaas meel uga dhicin.

Waxaa lasoo dhejiyey imtixaankii, waxayna aad ugu farxeen guusha ay gaareen, maalmo ka dib waxay araajidooda si wada jira ugu qorteen Dug. Sare ee SH. X. Barsame, si ay waxbarasho dugsi sare u bilaabaan, wayna heleen.

Waxay dhex galeen aqoon cusub, waxaa u bilaabatay tacliin dugsi sare, bilo ka dib waxaa dhammaaday sannad dugsiyeedkii, waxaa la galay fasax, waxaa furmay kii kale ilaa laga soo gaaro markey dhiganayeen fasalka 3aad ee Dugsiga Sare.

Markii imtixaankii xiritaanka dugsiga ay ka dhiman tahay laba bilood ayey ayeeyo Ceebla' aad u xanuunsatay, waxaa loo qabtay si lama filaana, waxayna sidii caadiga aheyd kula carareen isbitaal, balse markan uguma biskoon sidii hore. Maalmo

ka dibna iyaga oo sidii sanamkii u dul taagan ayey islaan tii Ceebla' naftu deysay.

Oo ma naf ba xday bey soo celin karaan? Mise a-mar eebbe bey h●r istaagi karaan? Layla inta cir-ka iyo dhulkuba la wareegeen bey iyad●o aan is og-eyn ku hoobatay dhulka.

Axmed intuu tallaabo kaga culus boqol rodol hore u qaaday mid kalena ka daba geeyey buu Layla ●o meel aan ka dheereyn ku barooraneysa intii ka-raankiisa ah isku dayey inuu u caqli celiyo.

Geerida islaantu Axmed waxay ku aheyd mid ka-ga culus wax kasta, waxayna ku riday argagax iyo murugo, maxaa yeelay wuxuu ka walaacsanaa wuxuu noqon do one mustaqbalka Layla, maadaama aysan maanta wax garaba ku laheyn dunidan ee a abbo-heed, hooyadeed iyo walaaleheedba hore u geeri-yoodeen; maantana ayeydeed oo aheyd midda kaliya ee ay weheshaneysay marka laga reebo abtigeed ayaa iyana geeriyootay; Layla waxay soo istaag-tay gegi bannaan oon wehel lahe yn?

Layla markey weyday ayeydeedii kaliyaheyd ee ay ifka ku weheshaneysay inta argagaxday oo na-xdin goysay baa afkeeda laga waayey waxaan aheyn "Alla sidee yeelaa, ma is gubaa, mise baddaan is-



-ku tuuraa? Ma sun baan cabbaa, alla ilaahayoow haddey sidaan ii dambeysay maxaan u ahaanayey.."

Markii islaanta aaskeedii laga soo noqday ee taosidii dhamaatay, Axmed wuxuu awoodda saaray si-duu deggaan nololeed iyo mustaqbal dhaba ugu heli lahaa Layla. Wuxuu aad uga fekeray meesha iyo halka Layla hoy u noqon doonta maadaama;-

-Aysan magaalada ku laheyn wax ehel ah oo ay gar-absato.

-Aysan meel kale u qixi karin, mar hadduu iskool-kii u furan yahay gabagabana yahay ●o aysan bade-lan ka rin.

-Uusan damiirkeedu u saamaxeyn iney guri cidla ah kaligeed deggenaato iyada oo ay wax kasta ku dhici karaan.

Goor galaba ayuu Axmed u yeeray Layla, wuxuuna weydiiyey;-"Abbaayo hadda maxaan sameynaa? Ma ji-raan wax qaraabo ah oo aad garaneyso ee deggan ma-gaalada inta arrintu si kale noqoneyso aan kuu sii geeyee?"

-Layla;- Wallaal taas waan ka hoogay baan filayaa ●o waxa kaliya oon xasuusanahay waa abtigeyga jira deg. Luuq ee gobolka Gedo ●e dalkeenna.

-Axmed;-"Oo ma leh miyaa xataa hal qof ●o intaan meel wanaagsan ka heleyno aad beryo lasii; joogto?"

Layla:-"Bal u kaadi....cabbaar ayey fekereysay; markaasey lasoo boodayy- ""Haa waxaa jira islaan Maryan la yiraahdo oo deggan deg. Kaaraan ee Muq-disho oo allaha u naxariistee hooyadey ay aad saaxiib u ahaayeen, intii ayeydey nooleydna dhowr jeer noo timid, ee bal ma ka war doonaa iyada?"

Axmed;-"Hadde ma tahay midaad u bareeri karto inta arrimuhu si kale noqonayaan aad lasii joogtide, mise shaki baad ka qabtaa?"

Layla:-"Wallaahi abboowe waa islaan xaasa oo hay-sata caruur fara badan, ninkeedii waa ka tagay oo wuxuu guursaday naag kale, ilmaheeda weli wax mushaar fiican qaata ama shaqooyin haya way ku yar yihiin, waxaana ayeydey ii sheegtay iney bannaanka la fariisato cunno bisil, shaah iwm si ay quutalyoonka ilma-heeda usoo saarato."

Axmed;-"Abbaayo anagu kama rabno inaan culeys kale kusii biirino, balse waxaa noo daran inaan ka helno hoy inta iskoolka ka dhiman aad kusii noolaato, wixii masaariiftaada ahna anagaa la baxayna ee tolow ma tahay mid na kaalmeyn doonta?"

"Waxay noqotaba berri galab haddii alla idmo ayaan ka war dooni doonaa, waxaanna ka filayaa iney si fiican ii gacan qabandoonto." bey tiri Layla.



Axmed;-" Ilaahayoow noo khasab intaan meel kale ka helayno, bal aad abbaayo" buu ku war celiyey.

Ka dib intey wejiga doodda badeleen ayey u galeen iney ka sheekeeystaan waxyaabo caadiya.

Markii la gaaray 9:30kii habeenimo ayuu Axmed usoo jiheystay gurigoodii, Laylana kaligeed wehe-shatay sariirta.

## QEYBTA 3aad

### Layla guurtey maxayse la kulantay?

"Ogoow abboowe inuusan dunida jirin ruux lagula ballamay dhibaato joogta sida uusan u jirin mid farxad iyo baraare ku waara. Gacaliye waxba ha isku abuurin calool xumo. Yeelo karti iyo kalsooni aad ku waajahdo wejiyada birta ah ee waqtiga. Ogoow dhibaato kasta iney leedahay wado lagu xallin karo haba raagto hadday habtee....."

Galabnimadii dambe ayuu Axmed soo aaday qolkii ca riishka ahaa ee a y Layla ku nooleyd. Albaabkii buu gargaraacay, toloow miyey maqan tahay? Oo xaggee aadi laheyd? Sariirta korkeeda ayey wax ku akhrisaneysaa. Inta ka furtay oo si fiican usoo dhaweysay bey u sheegtay iney islaantii inkastoo ay markii horeu deyrisay oo u sheegtay gurigu inuu aad u ciiriiri yahay uusana wada qaadin ay haddana ugu dambeystii ka aqbashay codsigeedii tirina;- "Bal iska soo guur inta aad meel kale ka heleyso."

Axmed baa ugu jawaabay;-"Abbaayo waxaa la yiri ;-"muraadkaaga masalle eyna waa loogu seexdaa oo waan ku meel gaareyna-aye u guur."



Layla guurtey maxayse la kulantay? Ayaan daranaa!!

Waxay dhex gashay qoys bulsho ah, dhallinyaro badan, odey uusan joogin, islaantuna maalintii oo dhan ay ka maqan tahay oo suuqa wax ku gadato. Waxaa loo arkay iney tahay adeegto la keenay, waxay ku bilaabeen gaar ahaan Nadiifo oo ka mida gabdhaha guriga jooga cadaadis iyo adeegsi badan. Xataa Nadiifo waxay mararka qaarkood isku dayi jirtey iney ka reebto aadista dugsiga iyadoo leh"Maxaa looga soo dhigayaa shaqada kaga dhuumaneysaaye."

Layla waxaa hareereeyey ciriiri iyo murugo horleh, waxay sameyso bey gara n weyday. Mararka qaarkood waxayba is moodsiin jirtey iney howshaa badani maslaxad u tahay waayo, waxay ilowsiineysaa fekerkii iyo xusuustii badneyd.

Sanad dugsiyeedkii waa dhamaaday, iskoolkiina waa la xirey. Waxaa Axmed iyo Layla dugsi sare uga haray hal sano ugase daran 11kii sano ee ay soo mareen marka la eego mushkiladda haysata.

Galabnimo Jimce ah X. Ciise oo inta guriga ka baxay baar u dhow meel kaligii ku fadhiya kursi buu Axmed kor ka arkay. Niyadduu iska yiri;-"Aleylehe waatan fursaddaan muddada badan raadinayey, galabta ayuu kaligii yahaye aan ka dhameeyo arrinkii Layla"

"Allahayoow haa iiga yeersii, ayaan badnaan lahaa-yaa hadduu iga yeelo" buu inta yiri oo soo socod b-oobsiiyey, kursi soo qaatay, agtana kasoo fariistay aabbihii X. $C_i$ise oo koob shaaha oo caddeysani ag-yaalo.

-"Ii warran Axmed? Sow ma fiicnid?" buu X. Ciise hadalkii ku bilaabay.

-"Haa aabbo aad baan u ladanahay " buu Axmedna ugu jawaabay.

-X. Ciise;-"Maxaa galabta darnaa kolleyba dan baad leedahaye?"

Axmed;-"Aabbo waxba ee anaa muraad yar kaa lahaa"

X. Ciise;-"Oo muxuu yahay maandhoow?"

Axmed;-"Aabbo wax saa usii weyn maaha waa arrin aan rabo inaan kula socodsiiyo."

X. Ciise;-"Muxuu yahayna arrinkaasi?"

Axmed;-" Aabbe haddii aan kuu sheego waxaan ka baqayaa inaad iga xanaaqdo ama si kale u qaadato."

X. Ciise;-"War maxaan kugu xanaaqaa ama iska daayaa iiba diidey waxaad ii sheegi laheyde."

Axmed;-" $K_u$u diidi maayee hadalka aan kuu sheegi doono aabbe go'aan aad ka fiirsatay ka qaado oo aabboow dhinaca samaha u bado."

X. $C_i$ise;-"War heedhe Axmed aabbe hana waaline soo daa waxaad wado ama naga dhaaf. Maxaad maantoo dhan iga iibineysaa hadalka " ayuu X. Ciise



oo xoogaa xanaaqay yiri.

-Axmed oo ka baqaya inuu aabbihii ku gacan sayro xaajadiisa ayaa haddana inta calool adeygay bilaa-bay qisadii tiiraanyada laheyd ee Layla;-" Aabbe waa gabar yar, agoona, raja, aan wallaalo laheyn, wax ehel ahina magaalada u joogin. Abbeheed, hooya-deed iyo walaaleheedba... wuxuu taako taako ugu sharaxay noloshii halaagga iyo silica badneyd ee Layla soo martay, isaga oo mararka qaarkood illini buuxineysay indhihiisa xusuus awgeed.

Wuxuu u sheegay aabbihii iney maanta gabadhaasi yari dul saar ku tahay reer aysan aqoon, walibana ay ciqaab xun ku hayaan meel kale oo ay u cursataa-na aysan jirin.

Marka aabbe adiga oo insaanimada eegaya gabadhaasi gurigeenna ha joogto intey dugsi sare ka dhameysa-neyso dabadeed meesha ay doonto ha aadee." buu Axmed si naxariis leh ugu soo jeediyey aabbihii.

X. $C_i$ise oo run ahaantii jiriirico dhameysay, xaa-duna istaagi gaartay intii uu Axmed u waday qisada Layla baa yiri;-"Maandhoow taas waan kaa yeelay oo gabadhu gurigeenna ha joogto ee keen intay waxbarashadeeda ka dhameysaneyso, laakiin mid aan ku weydiiyo; - " gabadha ma insaanimo iyo

naxa riis aadaminimo ayaad u wadataa oo rabbi kugu og yahay, mise maandhoow anigaad i dhegreysaa oo danbaad ku wadataa?" ayuu X. Ciise oo ka cabdi qaba in Axmed inantaa guur ka damacsan yahay yiri.

Axmed wuxuu aabbihii u sheegay iney caadifad insaanimo uun wado laakiin uusan dan gaara ku wadan gabadhaa miskiinta ah.

X. Ciise;-"Aabbo adduunyada waxa taajir-faqiir, mid dheer ku gaaban, mid madoow ku cad, mid akhlaaq xun ku dabeecadiisa aadan ka dhergeyn kuwada nool ha u qaadan inuu ilaaheen ummaddiisa kala jecel yahay balse waxaa ka dambeysa xigmad rabaaniya.

Waxaa la eegayaa bal sida kan qaninimada loogu deeqay uu saboolka u gacan qabto, kan awoodda iyo caafimaadka lagu maneystay u taageero miskiinka tabarta daran ee aan awoodi karin waxba iwm, marka maandhoow waxaan aad uga xumahay inaadan waqti hore ila socodsiin ee gabadha deg deg u keen gurigeenna, una sheeg Nasro iney inantaasi si gooniya u ogaato."

Axmed oo intii hadalkaa aabbihii waday farxad la dilaaci gaaray baa lasoo boday;-"Aabbo aad baad u mahadsan tahay."

-X. Ciise;-"Maandhoow carabtu waxay tiraahdaa



laa shukra calal waajib, oo taasi waa mid mar hore nagu habbooneyd balse adiga ayaa naga qarsaday."

Axmed wuxuu ka gaabsaday inuu hadalka sii wadwado maadaama dantii uu lahaa u fushay. Wuxuu qalbigiisu qaadi waayey farxad iyo reynreyn. Wuxuu naftiisa u sheegay inuu qaaday tallaabo weyn oo horumara; isaga oo weli isku maqan buu X. Ciise ku yiri;-"Berito subax haddii allaaidmo dukaanka raashin usoo gada adiga iyo Nasra."

Si dhaqso ah ayuu Axmed ula soo booday;-"Waa yahay aabbo macaan, arrinimada hore ayaan arrintaas bilaabeynaa aniga iyo Nasro, ee aabbo hooyana u sheeg in yartaasi guriga la keenayo."

-"Waa yahay, aniga igu halee taa" buu X. Ciise ka daba keenay.

Axmed wuxuu habeenkaa dhowr jeer ku sigtay inuu guureeyo si uu farxadda ula qeybsado Layla, waxaa wax ka-sta kala qiima badnaa guusha uu gaaray. Wuxuu habeenkaa seexday hurdo dhaba oo muddo dheer uusan arag, wuxuu dareemayey kalsooni iyo degenaasho dhaba, maadaama uu boos u helay Layla oo aheyd tan mashquulisay qeybta xusuusta ee maskaxdiisa.

Waxaa u bilaabatay nolol fiican:

Layla reer X. Ciise waxay ka taqaanay oo kaliya Axmed iyo Nasro oo ay iyada iyo Axmed oo wada socda dhowr jeer ku aragtay dukaanka. Danta ayaa wax kasta ku bartee waxay si rasmiya uga mid noqotay qoyskii, waxaa lagu soo dhaweeyey gacmo furan, gaar ahaan Nasro oo Axmed walaashii aheyd waxay ula dhaqantay si aysan walaaleheed kula dhaqmin, waxay si aada isugu taxalujisay iney daqiiqad kasta la socoto baahida iyo xaaladda runta oo gabadhaa.

Waxaa dhamaaday bilo, intii ay Layla joogtay reer X. Ciise. Waxay markan noqotay qof caadiya oo qoyska ka tirsan, waxay xoogaa ka nafistay fekerkii badnaa, waxay dareentay degenaasho nafsiya iyo isku kalsoonaan, waxay heshay waqti ay kaga tashato aayeheeda iyo mustaqbalkeedaba, kuna jeexato wadiiqada samaha iyo nabadgelyada oo ay qaadi doonto. Axmed qudheesu intii ay Layla kusoo biirtay qoyskooda wuxuu helay waqti ku filan oo uu ku xalliyo waxyaabo badan oo maskaxdiisa ka guuxayey.

Axmed iyo Layla markan wax weyn baa iska badelay xiriirkooda, isbarashadoodii walaaltinimo si tartiib tartiiba ayey isugu bedeshay kalgacal niyada, wuxuu mid kasta qalbigiisu la ciriiryoomay



Muxibo iyo jaceyl dhaba. Waxay axdi bira isugu qaadeen inuusan midkoodna damcin ruux kale intey ifka wada saaran yihiin.

Inkasta oo mucaashaqiintu ay aad digtooni uga qabeen in Axmed waalidkiis ogaado jaceylkooda, madaama Axmed lala rabay gabar ina adeertiis ah, haddana shaki baa galay X. Ciise iyo Cowralla.

Habeen Jimce ah iyaga oo guriga ku fiidsanaya ayey Cowralla si kadisa ula soo booday;-"Horta xaajiyoow in wax la is weydiiyaa ma xumee wiilkan iyo gabadhan arrimahooda maxaad ka og tahay?

X. Ciise;- "Maxaa jira? Maxay yihiin arrimahaasi?

Cowralla;-"Wiilkan iyo gabadhan har iyo habeen isku naban ma aigaa wax la wada, aawayse miyaadan nin weyn oo qowl leh aheyn, meeyey reerkii aad ballanta laheydeen?"

X. Ciise;-"Sidee wax u jiraan ma fahmin hadalkaagee."

Cowralla;-" Sannado badan ayaa kasoo wareegtay markii adiga iyo Aw-jaamac aad go'aanka ku gaarteen in Basra iyo Axmed aad isku dareysaan, waliba adiga ayaa ballan qaaday inaad isu dhiseyso waqti kasta oo ay ku habboonaato, maantana gabar aan la aqoon meel ay ka timid iyo wax dhalay toona baad cir-

-ka uga soo riday, markanna waxaan Xaaji hubaa iney is-qabaan haddii aysan is qabina waxay hadda gaareen heer uusan midkoodna kan kale la'aantiis joogi karin oo ay isku qarwaan. Marka sidaad yeeli lahoyd iyo meeshaad arrin ka bilaabi laheyd adiga ayey ku jirtaa."

X. Ciise qudhiisu tuhun waa qabay oo waa ogaa in dhowrkii bilood ee ugu dambeeyey Axmed iyo Layla xiriirkoodu uusan sidii hore aheyn. Inta Cowralla soo jaleecay buu yiri;- " Horta Cowralaay horaa loo yiri: dad iyo duurba wax aadan fileyn baa kaaga soo baxa, waana runtaa oo Basra waalidkeed iyo aniga waxaa na dhexyiil balla n adag oo aan anigu markii hore waliba la doortay; Axmedna dhowr jeer ayaan arrintaas ka wada hadalnay. Xataa galabtii uu gabadhan xaalkeeda ila soo odsiinayoy wuxuu dhaar iigu maray inuusan Basra mooyee midkale oaloosha ku heyn, inanjanna uu islaanimo uun u wado.

Balse haddii uu isku dayo inuu qolkeygii buriyo ba llanteydiina ka dhigo waxaan jirin taasi marnaba u soo meygo oo haddii xaalka aad sheegeysaa run yahay laba jid ayaa u furan aan mid 3aad lahoyn:(in labbadoodaba ay deyro isla noqdaan oo uu reerka iyo gabadhaa kala doorto iyo iney sidey noo soo qeshay noo dhaafto gabadhaasi.)"



Xaaji waxaa la yiri: qori iyo qiiqiisa waa la isla tuuraayo maxay kula tahay haddii aan gabadhaa si wanaagsan u ambabixinno, meeshay doonto ha aadeo." bey Cowralla soo joedisay.

X. Ciise;- "Horta Cowralaay wax walba hubsasho ayey u baahan yihiin, anna nin weyn oo qowl leh baan ahay. Aniga iyo Axmed ballan aheyd in gabadhaasi intey dugsi sare ka dhameysaneyso ay guriga joogto baa naga dhaxeysay.

X
Xilligii ay imtixaanka kama dambeysta ah ee shahaadada dugsiga sare u fariisan lahaayeenna waxaa naga xiga wax yar, marka ciini tagay oeeb lagu sagootiyee aan xaalka oagta " dhigno inta waqtigaa yari ina dhaafayo, haddii aan ha'da ... seefta qalka kala baxo, waa marka horeo waxaan noqona yaa mid aan qowl laheyn, midda kale waxaa laga yaabaa iney taasi welwel iyo feker xad-dhaafa ku rido Axmed, ka dibna uu khalkhalo oo awoodi kari waayo inuu ka gudbo imtixaanka kusoo fool leh.

Markaa waxay aniga ila tahay Cowrallaay inaan yara sugno inta laga gaarayo maalinta ugu dambeysa imtixaanka." Cowrallana way ka oggolaatay.

Wax Axmed iyo Layla ay ku waaberiistaan faraxad iyo reynroyn, waxay sidii hal iyo nirigteed laba aan kala maarmain ahaadaan, wax marka ay is-

-koolka joogaan qof kastaa u qaato iney yihiin laba uur hooyo wada jiifsaday, naasna wada nuugay, wax midba kama kale la'aantiis u arko in duniduba tahay mid aamusan oon shanqar laheyn, waa baa beryaba warkiisa lehe waxaa la gaaray aroornimadii ay u fariisan lahaayeen imtixaanka.

Iyaga oo ay ka muuqato isku kalsoonaan iyo cabsi la'aan ayey abaareen goobtii ay imtixaanka ku galayeen. Iyaga oo aan is ogeynna waxaa dhammaaday maalmihii imtixaanka loogu tala galay.

Maadaama labadoodaba uu heerka waxbarashadoodu aad u dhisnaa, waxay rajo weyn ka qabeen iney natiijo waqiyo guul ka gaari doonaan imtixaanka soo dhejintiisa marka natiijada ay la kulmaan.

Waxay la kulmeen wax aysan fileyn:
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Waa baa beryey subax Arbacaad. Layla aroortii hore ayey kacday sidii caadada u aheyd oo diyaarisay quraacdii reerka, Axmedna 8:Celii subaxnimo ayuu soo toosay isaga oo X. Ciise iyo Cowrallaba diyaar u yihiin. Inta u yeereen bey isaga oo la yaaban xaajada saaka waidkii ka rabo la galeen qolkii fadhiga.

G'aanku ma aheyn mid meel dheer laga doonayo



ama talo laga weydiinayo oo horuu u dhameystirnaa, isla markiiba X. Cise ayaa lasoo boday "Axmedoow go'aan kama dambeysa oo aan ka noqosho laheyn laba kii kuu roon mid yeel, inaad haddaba reerkaas waxaad ku leedahay kala soo baxdo adiga iyo gabadha a ad hoosta ku wadataana na dhaaftaan oo habaar iyo cuqubo waalid aad faraqa ka buuxsato iyo inaad si deg dega noo dhaafiso gabadhaa meeshay rabto ha aadee. Labadaa kii aad yeeli laheyd baan jawaabteeda isla hadda kaa rabaa."

Axmed markii hore arrintuba waxaan run aheyn bey ula muuqatay, laakiin markuu arkay xaaaaqa iyo kuleylka ka muuqda odeyga iyo habarta ayuu dareemay in xaalku ka weyn yahay mid dheel dheel ah, waxaa kor iyo hoos u qaaday maayad ku socota awood sare.

Waxaa ku dhacay filan waa, cabbaar ayuu inta aamusnaa bal doondoonay jawaabta uu ku qancin karo Waalidkiis, laakiin inta sasay buu garan waayey wax alla wuxuu ku hadlo, markii cabbaar ka kala aamusnaa ayuu X. Cise inta jeebka gacanta gashay oo kasoo saaray dhowr boqol oo shillin yiri;-" isla hadda gee gabadhaan meesha baabuurta laga raaco oo ha aado abtigeedkii ay sheegeysay, yaananna maanta guriga ugu iman, haddii aadan isu kaaya wadin" oo inta cimaamadiisii garabka saartay iridda

ka booday isaga oo aad u kaosan.

Axmed wax jawaab ahba waa laga waayey oo aamusbaa kasoo haray, muxuuse ku hadlaa? Qowl ma kusoo celin karaa aabbihii oo xanaaqa iyo dhirifka ka muuqda wejigiisa dhidid qooyey?

Markuu baxay odeygii oo Axmed oabbaar aamusnaa ayaa inta neef weyni kasoo baxday oo uu soo qabtay lacagtii odeygu agtiisa kusoo tuuray saani u eegay hooyaddi Cowralla oo weli iyadu meeshee cdii fadhida, markaasuu hadal naxdin leh ku su'aalay;- "Hooyooy sow wuxu adduunyo maaha, sow la geli maayo gad aan ehel iyo arxan laheyn, sow hooyooy ma ogidin in eebbe ummaddiisa taajirnimo ka simi karo, balse uu faqiir iyo qaniba u abuurtay si uu isugu eego kooda miskiin urursha ah oo caadifadda insaanimo damqeyso iyo kan arxan laawaha ee wadnihiisa naxariistu ka guurtay.

Hooyooy mayeydmaan rabbi ka togeyh, waa maxay waxaad kula dhaqmeysaan miskiintaa rajada iyo agoonta, ehelna uusan u joogin magaalada; waa adinka lacagta usoo tuurayee xaggee la aadeysaa!!!! Oo inta indhihiisa ilmo buuxisay oo hoos eegay yiri haddana;- hooyooy diö isugu noqda oo go'aankaa ka fiirsada."



Cowralla oo erey orey ula soootay hadalladii Axmed baa lasoo booday;- "Maandhoow waxba ha is murjin hana iska dhigin sidii wax uu cirku kusoo dumay, lagama yaabo marna iney gabadhaasi gurigeenna sii joogto, waana go'aan aan muddo dheer ka fiirsaneynay, oo inta uusan xaajigu waxaad wax ka xun ku kicin u dir gabadha abtigoedkii ay laheyd Luuq buu jiraa, haddii aysan ehel kale ku laheyn magaalada", oo inta garbasaarteedii kor u qaadatay oo istaagtay tiri haddana; ""Waa sagaalkii subaxnimo ee istaag ambabixi gabadha anagu af kuma lihine" oo albaabka ka baxday.

Caku adduunyo ileen taadu kuuma hirgasgo markasta, waa maxay qorshe iyo ku tala gal ay watcen Axmed iyo Layla balse laga kala tuuray. Ayaan darro weynaa!! Muxuu sameeyaa!!! Muxuuse awoodi karaa?.

Wuxuu ka shaqeysiiyey qeybta xusuusta ee maskaxdiis sa bal inuu helo boos uu ku miidaamiyo gabadha oo magaalada ah; waase kee qoyska uu u geyn karaa? Kolleyba sow ma noqdeen mid odeyga ama habarta xagooda ka sooda. Ma ay moogaan doonaan soow markaba kashifmi meyso oo lama ogaan doono, xaguu geyn.

Muddo hal saaca ayuu siduu suuxsan yahay dulyaalay kursigii aabbihii uga tagay, ugu dambeystiina inta oalool adeygay ayuu gaaray go'aan khasaba, maadaama aan rajo laga qabin in waalidkii uu xaalkan ka noqdo, uu-

sanna u bareeri karin habaar iyo deyro, wuxuu talo ku goostay in Layla ay u dhoofto Abtigeed, ka dibna uu jihaad dheer u galo siduu ku gaari lahaa mar uun inuu ka madaxbannaanaado gacan ku haynta waalidka, uuna ku heli lahaa dhaqaale shakhsi ah oo awood u siinaya inuu xilli kasta ha noqotee mar uun Layla kusoo celiyo Muqdisho iyagoon bani'aadam kale gacantiis hoos joogin.

Intuu ku jirey fekerka iyo welwelka ayey Layla kasoo gashay albaabka iyada oo u sida quraac, Layla wax dareentay mase oga heerka mushkiladdu gaarsiisan tahay.

Waxaa shaki galay markii saaka X. Cise iyo Cowralla inta Axmed u yeereen iyagoo wejigoodu badelan yahay la galeen qolka muddo ka dibna iyagoo aad u xanaaqsan kasoo baxeen. Waxay la yaabtay markii Cowralla oo kasoo baxday Axmed kurshiinkana ugu soo gashay ay weydiisay dhowr su'aalood oo caadiya balse Cowralla inta indhaha ku gubtay iyada oo aan wax jawaaba siin ka dhaqaaqday.

Arrintu si kastaba ha noqotee Layla wax dareentay hase yeeshee ma oga meesha qoonsimaadku ka yimid, waxay ku kalsooneyd in wax kasta ha noqdeene xaajada oo tifaftiran ay ka heli doonto xabiibkeed Axmed. Inta quraacdii miiska u saartay



oo oabbaar hor taagneyd ayey fariisatay kursi meesha yiil.

Axmed wuxuu garan waayey wax uu kula hadlo iyo meel uu hadal uga bilaabo. Inta xoogaa oalool adeyga iska baarbaaray ayuu isagoo aad u murugeysan indhihiisana ilmo ku joogto dabiyo dacal la soo dsiiyey Layla wixii saaka meesha ka dhacay iyo go'aanka kadiska ah oo oggolaashihiisa lagu khasbay.

Inta gacantiisa midig kor u qaaday oo xoog ugu dhuftay kursigii uu ku fadhiyey dacalkiisa buu isagoo tiiraanyeysan yiri;-" Abbaayo illeen balaayo isuma kaa sheegto. Bal hadda maxaan sameynaa. Anagoo gacmaha is haysanna moolka ma isu dhignaa badweynta si qaxarka dunidu ba nod daayo?"!!

Hadalkii bey ka qaadatay oo tiri;"Abbowe maxaan waxaad weli ka war la'dahay hagardaamooyinka iyo imtixaanaadka dunida. Waxaad ogaataa adduunyadu inay tahay maalin iyo habeen, mid saaaadadaada iyo kheyrkaaga ah iyo mid hoogaagga iyo baaba'aagga ah, marka wallaal waxaa lagaa doonayaa inaad lahaato karti iyo u gogol manjaxaabooyinka waqtiga. Ogoow inuusan dunida jirin ruux lagula ballamay dhibaato joogto ah sida uusan u jirin mid farxad iyo baraare ku waaraya.

Gacaliye waxba ha isku a buurin calool xume, yeele karti iyo kalsooni aad ku waajahdo wejiyada birta ah ee waqtiga. Ogoow dhibaato kasta iney leedahay wado lagu xallin karo haba raagto hadday rabtee."

"Abboowe nolosha waa wado aad u dheer meel aad uga leexataana aysan jirin, wax kasta shar iyo kheyrna ay kugu sugayaan. Waxaa laga yaabaa daqiiqad adoo la kulmay guul iyo sacaado aadan weligaa fileyn in daqiiqadii ku xigteyna ay ku balleyso musiibo xusuus tiiraanyo oo aan tirmin ku reebta qalbigaaga.

Waxaan mar kasta kugu waaninayaa abboowe yeelo karti iyo kalsooni aad uga hor tagto xilliyada adadag ee waayaha. Ha is raacsiin wax kasta oo ku farax ama tiiraanyo geliya ee ogoow iney marwalba dhammaanayaan. Tan kale anigu hadda ayaan baxayaa, waxaanna aadayaa abtigey iyo Luuq ee inta is calool xumeynta iska dhaafid abboowe waqti yar baan haysanaaye aan ka tashanno arrimaheenna."

Run ahaantii jawaabta uu Axmed siin lahaa Layla aad bay u dhibeysay, wax walibana waxay ula muuqdeen kadis iyo filan waa, hase yeeshee Layla oo iyadu naxdin goysay, hagardaamooyin lixaad lihina usoo horeeyeen ayaa waano iyo wax tusaaleyn kala



daashay, ilaa ay si caadiya meel u wada dhigtaan axdi bira iyo ballan qaad midba kan kale aad ugu adkeeyey inuusan jabin.

Axmed oo isidii uu cudur ku daahay kasoo bogsanayo si u maahsan ayna hortaallo quraacdii saaka loo keenay, Laylana hor fadhido ayey hooyo Cowralla albaabka kasoo gashay oo tiri;-"War waa maxay teer iyo saaka qaraan dhurwaaga aad ikku akhrineysaan, waase maxay qorshaha aad dejineysaan? Maxaa meesha yaal oo aan maya iyo haa aheyn."

Layla inta isku naxday ayey albaabka ka baxday, Axmed oo wejigiisa aad u badelan yahayna inta soo fariistay buu yiri;- " Hooyo haddii aadan qiimaha aadaminimada tixgelineyn maad ka cabsatid rabbigii ku kha lqay ee kaa ahaysiiyey waxba. Maxaad miskiintaa yar nolosha ugu ciriirineysaan?"

Cowralla oo aad u xanaaqsan ayaa tiri;- "Waryaa ha ka dheereyn tallaabadaada, ma adaa na waaninaya mise anagaa kuu talina, miskiintu miyeysan dad laheyn? Maxaa na ag dhigay haynay intaan hayn karaye, muranka iyo calool jileeca inta iska dhaaftid yaanan u jeedin maagta ee arageeda i dhaafi."

Layla oo erayadaas Cowralla kalmad ka lmad ula socotay inta horey u qaaday tallaabo kala culus 1000 rodol ayey cohin iskula duuduubtay saruurta. Oo yey

maxariis ka fileysaa aan ka aheyn ilaaha weyn iyo Axmedka aan u awoodin waxba. Iyadoo madluunsan ayey inta kasoo istaagtay sariirtii urursatay calaladeedii. Axmedbaase inta u yimid u sheegay iney bal maanta dharkeeda iska dhaqato berri subax haddii alla idmana tagto.

Maqribkii markii la gaaray iyadoo Layla wax waliba diyaar u yihiin buu Axmed usoo jeediyey iney caawa galaan filim si bal xoogaa isu moogeysiiyaan dhibaatadan. Iyana way ka yeeshay.

In kasta oo ay galeen filimkii ay rabeen, haddana celcelis ahaan inta ay filimkaas ka fiirsadeen haddii la isu geeyo kama badneyn daqiiqado, waxaanna u socotay daad, tashi iyo raadin xalka ugu fudud ee ay ku heli karaan wadiiqada samaha iyo sidey adkeysi iyo niyad bira ugaga gudbi lahaayeen dhibaatooyinka kusoo fool leh.

Sidii midba kan kale waano iyo talo soo jeedin ugu waday ayey is arkeen iyagoo kaligood dhex fadhiya shaneemadii. Saacadda ayuu Axmed eegay mise waa 12:00kii habeenimo oo daqiiqado dhiman. Intay istaageen bey usoo jaheysteen dhankii guriga:"malaha waxayba heleen waqti nafisa oo ay si dhab iyo Lillaahi ah ballan iyo wacad adag isula meel dhigtaan."



Socdaal nabadeed bey isu diyaarisay:

Waxaa beryey waa laga yaabo iney dad badani la kulmeen farxad iyo reyn reyn, laakiin wadnayaasha is doortay ku reebay xusuus aan tirmin, una ahaa maalin baas.

Waa maalin Khamiisa bartamihii Luulyo, waa maalintii Layla u bixi laheyd safarkii qasbanaa. Aroornimadii ayey labadoodiiba ku kalleheen barxadda Ceel Gaab ee M. Muqdisho ee basasku ka baxaan. Nasiib darro ma helin bas maalintaa u socda Deg. Luuq ee ka tirsan Gobolka Gedo ee dalkeenna, waxaanna loo sheegay in Sabtida ka hor uusan bas baxeyn.

Axmed wuxuu is moodsiiyey inuu helay fursad kale oo Layla kusii joogi karto, maadaama maanta iyo berri oo Jimce ah midna uusan baabuur baxeyn, hase yeeshee Layla waxay ku adkeysatay in bixitaankeedu uusan maanta ka dambeyneyn.

Markuu arkay sida ay jeceshahay bixitaankeeda maanta ayuu awoodda saaray siduu ku heli lahaa gaadiidkii nabadgelyada ee lamaanaha naftiisa gaarsiin lahaa goobtaa.

Layla wax walba waxay ka door bidaysay in tagideedu aysan maanta ka dambeyn.

Waxaa la gaaray 12:kii duhurnimo, wax bas ahna ma aysan helin weli. Layla weli kama aysan rajo dhigin in tagideedu maanta ahaato, Waxay Axmed usoo jeedisay fikraddan;- " Abbocwe waxaa jira baabuur isjiidyo ah oo qaadaa xamuulka, aadana Luuq iyo degmooyinka ka sii shisheeyaba, baabuurtaasi sida badan lagama helo halkan, laakiin lama waayo, waxaanna ku heli karnaa annaga oo istaagnaa koontaroolka Muqdisho ee dhanka Afgooye ama geedka weyn ee garaska ay ee baasha shishe kaga yaala deg. Afgooye, halkaas oo ay badanaa ku hakadaan, rakaabna kasii qaataan, waxaanna hubaa in aanaan marnaba ka waayeyn halkaa gaari."

Axmed baa weydiiyey;- " Oo hadda ma waxaan raacnaa NISSAN-da Afgooye u sooda?"

-"Haa abboowe " ayey iyana ugu jawaabtay.

" WAANA MAALINTA BILOWGA SHEEKADA EE LAYLA "
" 3 DII GALABNIMO IYO DAQIIQAD U AMBABAXDAY "
" L U U Q. "



Waxay qaartay goobtii qasdigeedu ahaa !!

"Gacaliye ma waa barisan, gabalna iima dhicin, mana oawo beryin maalin qura iyada oo aysan qalbigeyga ka buuxin xusuustaadu tan waagii isugu kaaya dambeysay. Niyaddu weli waa sidoodii, ma damcin damcina maayo waligeey adoo mool nin kale, waxaan weli kor u hayaa kana dhowraa boorka axdigeennii qaaliga ahaa anoo huba adna inaadan...."

Waxaa yimid waqtigii ay Layla u bixi laheyd socdaalkeedii, si lama filaana ayuu midkood ba kii kale ugu xaday deymo kalgacal oo qoto dheer. Si aamusnaan iyo xishooda ayey dhunkasho qiiro leh dhabanka isugu dhiibeen dhowr jeer, is nabadgelyeyn iyo dardaaran xoog leh ka dib waxaa wareegay shaagii gaariga, baabuurkiina waa dhaqaaqay.

Axmed wuxuu galay aamus dheer, eegmadiisuna libiqsi la'aan waxay la socotay muuqaalka dahabiga ah ee Layla ilaa ay ka qarsoonto iyada oo gacanta usii luleyesa si ay u nabadgelyeyso.

Layla ambabaxday dhowr iyo toban saacadood ka dib ma waxay hulleysay degmadii qasdigeedu ahaa.

Layla waa ageom rajo ah, Muqdishona kuma laheyn

wax ehela aan ka aheyn ayeydeedii waqti hore geeri-
yootay, waana arrintaa tan ku qasabtay iney soodaal
aysan raalli ka aheyn balse dani ku tiriya ugu kici-
tinro Deg. Luuq oo ay ku nool yihiin qoyskii abtig-
eed.

Abtigeed Guleed ma haysto hanti buuran oo lagu
tilmaamo wuxuu leeyahay baabuur isjiida, haddana
hantida kasoo gashaa waa mid ay ka baahan yihiin
reerkiisu.

Sannado ka hor wuxuu ka dhex shaqeysan jirey
xuduudda dalkeenna iyo Kenya, laakiin xilligan
lama arag muddo sannad iyo bar ku dhow, waxaana la
soo we riyey inuu ka dhex xamaasho Tansaaniya, Kenya
iyo Uganda xuduudahooda.

Guleed xaaskiisu waa xaas ka Nooban 7 carruura
oo gabdho ah iyo hooyadood. Maadaama maqnaashihiisu
badan yahay wuxuu reerka usoo diraa masruuf aan fiic-
neyn, mararka qaarkoodna waxayba ku nool yihiin nolol
silica, waxaa kaloo Guleed uu magaalada Nayroobi e e
dalka Kenya ku qabaa xaas kale oo laba carruura wiil
iyo gabar leh.

Sida kuu muuqata Layla ugama banaana boos qoyska
abtigeed, laakiin waa huriwaa iyo dani ku tiri. Iyada oo boorsadeedii garabka ku sidata ayey balleysay
reer abtigeed iyo Luuq.



Lasoo dhawee inkastoo ay muuqatay inaan raalli
laga aheyn kusoo biiritaankeeda qoyska, maxaa yee-
lay culeys iyo kiil iyagaa isugu filnaa.

Waxay la kowsatay iyadoo aan muddo laba bilooda
aan wax wara laga helin abtigeed. Layla xaalad
kastaa ha jirtee waxay si rasmiya uga mid noqotay
qoyskii, waxay waxay qabaanba la qabtay xubnaha kale
ee Qoyska.

Waxaa kasoo wareegatay muddo bila intii ay Axmed
iyo Layla soo kala maqnaayeen. Run ahaantii ma jirin
si ay xiriir joogto ku wada yeelan kareen labadoodu,
maadaama uusan midkoodna laheyn santuuq boosto ama
meel kale oo muhiima oo ay wararka isugu soo hagaa-
jiyaan.

Labadoodaba waxaa joogto u noqotay iney saacado
bada n waqtigooda ku qaataan busteejada basaska u
kala goosha caasimadda Muqdisho iyo Deg. Luuq, bal
iney helaan ruux aamina oo ay ku kalsoon yihiin ayna
dhambaalladooda usii dhiibaan.

Maalin Arbaca ah Laylana ay sii maqan tahay muddo
ayuu Axmed helay fursad qaaliya. Wux uu la kulmay
C/casiis oo sannado ka hor ay isla dhigan jireen
dugsi dhexe una sooda Luuq. Waqti dheer kuma q-
aadane warqad u diyaarsaneyd ayuu inta jeebka ka-

-soo saaray gacanta u galiyey C:casiis, aadna ugu adkeeyey in dhibaato kasta la ku qaadatee uu awoodiisa isugu geeyo siduu warqaddaa u gaarsiin lahaa hoyga ay ku nooshahay Layla.

Waxuuna C/casiis siiyey tilmaan muhiima oo ay awal isagana Layla u qortay. Waxaa dhaqaaqay baskii ugu horeeyey ee sida dhambaal ay is weydaarsanayaan qalbiyadii mataana-ha ahaa, uuna sido C/casiis oo ballan adag uu qaaday in haddii alla idmo uusan soo noqon doonin isaga oo aan war sugan saaxiibkiis uga sidiin halka uu tabanayo.

Markuu C/casiis tagay magaaladii ee uu balleeyey gurigii uu u socday, cabbaar nastay, ayuu galabnimadii Jimcaha inta gacanta kusii qabsaday dhambaalkii qiimaha badnaa ee Axmed iyo warqaddii tilmaantu ugu qorneyd aaday meeshii loo soo cayimay, siduu usii socday ayuu gargaraacay albaab, gabar yar ayaa ka furtay, markaasuu yiri;- "Wallaal sow gurigii Guuleed maaha?"

Yartii;- " Haa wallaal "

C/casiis;-"Abbaayo Layla ma joogtaa?"

Canab;- "May, wallaal mar dhow ayaa suuqa loo direy" weyse imaaneysaa maraan dheereyne maxaan u sheegaa?"

C/casiis:-"Niyadda ayuu uga mahad celiyey ilaahii



balleysiiyey gurigii saaxiibkii u comanaa. Markaas ka dib buu inta gabadhii usoo jeestay yiri;-"Abbaayo waan sugayaa."

Canab;- "Waa yahay ee soo dhaaf fariiso."

C/casiis;- "Inta horey u galay gurigii buu ku fariistay kursi ay gabadhii kusoo dhaweysay."

Markuu muddo labaatan daqiiqo ah fadhiyey ayey Layla oo wada alaabtii loo direy albaabka kasoo gashay, markiiba "wiil baa kuu joogaa" baa lagu salaamay.

Niyadeedee waxay qalbiga iska tiri;-"Tolow ma Axmedbaa?" oo durba daf tiri qolkii, mise waa wiil aysan weligeed arag, aqoonna. Intey naxday oo dib u hakatay ayey tiri;-"Wallaal ma nabad baa?"

C/casiis:- " Nabado adigu ma fiican tahay?"

Layla;- "Nabad wallaal"

C/casiis;-"Abbaayo sow Layla ma tihid?"

Layla;- "oo aad moodo iney hurdo kasoo sastay baa lasoo boodday:haa ee wallaal ma Muqdishaad ka timid?"

C/casiis;- " Haa oo waxaa warqad iisoo dhiibay...

Layla;- "Isaga oo aan hadalkii dhameyn ayey ka dhex gashay oo tiri: Axmed baa?"

C/casiis;- "Haa"

Layla;-"Oo sugi la' inta C/casiis warqadda kasoo saarayo baa tiri;- Abboowe keen."

C/casiis;- inta boorso uu watay Gacanta geliyey oo kasoo saaray warqad buu farta ka saaray Layla oo sugi

la'ayd.
Wax yar ka dib Layla waxay sii sagootisay C/casiis iyadoo degdegsaneysa akhriska warqadda ay ka heshay midkey dunida ka calmatay, inta ilaa iyo albaabka sii dhaweysay ayey kaga daba tanaagootay;-" Abboowe goormaad Xamar u noqoneysaa?"
C/casiis;-" Baa inta istaagay yiri: haa abbaayo waanba kaa iloobay, waxaan joogayaa toddobaad kaliya, waxaanna haddii e ebbe idmo kugu soo noqonayaa maalinta Jimcaha ee soo socota, Sabtidana waan bixi doonaa."

"Abboowe ha iga tagin ee isoo mar warqad baan kuugu dhiibayaaye" bey Layla kusii adkeysay.

Lagama yaabo hadduu cimrigeygu igaarsiiyo inaan baxo anigoon kusoo marin, waayo anoon war buuxa kaaga sidin Axmed weli aan ugu tagaaba iguma yaal" buu C/casiisna ugu war celiyey isaga oo sii dhaqaaqaya.

"Wallaal nabadgelyo" ayey inta tiri tiigsatay qolkii ay s eexan jirtey, intey sariirteedii tagtay ayey si dhaqso ah galka uga jeexday warqaddii, akhrisna ku bilowday.

Run ahaantii xiskeeda iyo dareemayaasheeduba caadi ma aheyn, waxay ku baraarugtay dhowr jeer illin dhibco dhibco ah oo kusoo daadatay warqaddii ay akhrisaneysay. Intey labada indhood xoog isugu qabatay,



Ilmo kululna hoos ula oroday daamankeedii dahabiga ahaa ayey gedi cad isugu tuurtay sariirtii oo mar kale warqaddii akhris dabiyo dacal bogtay.

Sidii qof jirro ku daahday kasoo boqsanaya ayaa inta neef weyni kasoo baxday oo warqaddii laabta saaratay, labada gacmoodna dhinacyada u kala ridatay bey si najiiba erayo naxdineed hoos ugu tiri;-"Allahayoow maxaa i baday sidan! Allahayoow adaa wax walba awoodeeiga saar ciriirga. Tolow waa aldunyee ma arki doonaa aniga iyo Axmed oo si wada jira guur xalaala gacmaha isu dhaafsanay, oo si farxad leh aroor samaad isaga ag waa bariisanaya."

Inta warqaddii kor usoo qaaday oo sawir Axmed oo ku dhex jirey dhowr jeer dhunkasho u dhiibtay bey akhris haddana min hor iyo gadaal bogtay.

Layla iyada oo aan awalba qumaneyn ayuu dhambaalkii Axmedna niyad kac ku abuuray, waxaa danqatay boog, waxaa kusoo laba kacleeyey jaceyl waalan oo qasay xubnaha jirkeeda, waxaa ku dhashay wel wel hor leh, waxay towday garabka ka maqan, waxayse mar walba nafta u sheegeysay in haddii ay la timaado dedaal iyo kalsooni nafsiya ay mar uun gaari doonto waxay tabaneyso.

Layla damacday iney dejiso moWjadaha qeybta xu-suusteeda oo cirka isku shareeray, balse ma awoo-din taa, waxay gocotay waayihii samaha ee ay ku dho-xnooleyd qoyskii ay curadda u aheyd. Maxaad cuni kartaa? Maxaad cabi kartaa? Maxaa....lala daba joogay, waxay dib u xusuusatay muxibadii iyo koolkoolintii Waalid-keed kula dhaqmayey yaraanteedii iyo sidii mucjisa-da laheyd ee cebbe u dhaafshay.

Dhinaca kale waxaa uga soo duxayey kaalmadii aad-aminimada laheyd, taageeradii iyo gaoan qabashadii ni-yadda aheyd ee uu u fidiyey midka aysan ilaah kasokoow xilligan soo gaarteed la'aantiis iyo kalgacalkii dhex-maray ee markuu xoogeystay laga kala tuuray. Waxaa ta-ako taako sidii filimkii maskaxdeeda ay uga dhex daaWa-neysay Wixii soo maray ee nasiibkeedu usoo hor marshay.

8:00dii habeenimo ayey Canab soo gashay qolkii jiif-iyada oo la yaaban waxa ku dhacay Layla oo sidey maqrib-kii u kortay sariirta aan kacoo degin. Inta soo kor i-taagtay bey tiri;-"Abbaayo ma xanuunsan tahay caawa waa-adiga sariirta ku uursane?"

Layla;- "Haa abbaayo madaxaa aad la iiga hayaa?"

Canab:-"Kaniini madax xanuun ma kuu doonaa?"

Layla:- "Maya abbaayo iska dhaaf aad la iima hayoo?

Canab;- "Abbaayo feebarahan(iyadoo madaxa gacanta ka s-reysa) waa kaa degeyaayo aan kuu doono?"



Layla;- Yaa u sheega in daaWadeydu ay ka shisheyso boqollaal KM meel ka dheer!! Bey inta niyadda tiri oo Canab usoo jeesatay haddana ugu jawaabtay;-"A-bbaayo waa ladanahaye ha is dhibin."

Canab inta bannaanka u baxday ayey u keentay L-ayla xoogaa iyo casho ah iyo shaah wayse ka diiday, una sheegtay ineysan waxba cuni karin caawa.

Habeenkaa Layla wuxuu u ahaa habeen baas, indhaha-na isuma geyn, sidey ugu galgalaneysay sariirta kor-keeda ayuu ka dul yeeray aadaankii salaadda subax.

Marar badan bey damacday iney isku qasabto hurda-da laakiin xusuusta waayaha ayaa u oggolaan waayey taa.

Aroornimadii markay hawshii guriga dhameysay ayey tagtay sariirta si ay u seexato, wax yar ka dibna wa-xay gashay waxaan hurdo la oran balse ay u haysatay suuxdin dheer. 2dii duhurnimo ayaa loo kiciyey qado, waxayna Canab ku tiri;- "Abbaayo qado ma rabee idaa!!"

Kalama kulmin wax ka badan intuu u sheegay!!!
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Layla waxaa laga hayey meel aysan aqoon, waxaa shi-dayey cishqi iyo boholyow kay u haysay dani kala geysay.

Alla waqtigu u daranaa oo nasiibkeedu xumaa; side-odii habeenimo ayuu guriga hortiisa si aayara ulas soo

wareegay gaari isjiida oo uu ka muuqdo inuu soo galay safar dheer. Markuu aqalka hortiisa la sigalay safar dheer. Markuu aqalka hortiisa la simar yahay ayuu wadihii bareegga ku qabtay, joojiyeyna, dareewalkii markuu soo degay ee uu oagaha dhulka dhigay ayey kuwada xoomeen dhammaan caruurtii iyaga oo farxad tallaabada qaadi la' lehna "Alla waa aabbe, alla waa aabbe ..markii ilmihii salaameem ayey Laylana isku duubtay abtigeed abtigeed oo aysan muddaba arag.

Guuleed kamuu fileyn meesha, wuxuuna lasoo booday ma Layla? Ina Warsame? Abti ii warran? Goormaad timid? ...wareysi deg dega ayuu la galay.

Markii muddo la joogay oo la caweysimay buu Guuleed yiri;- Hadda waxaa i keenay arrin deg dega, waxaan magaalada Nayroobi ee dalka Kenya idiin ka diyaarshay guri aad degtaan, maadaama anna aanan ka maarmin meeshaa adinkuna aydnaan iga maarmin waxaan u guureynaa Nayroobi, waliba si dhaqso ah, waayo arrimo iga xirxiran ayaan rabaa inaan ka gaarsiiyo."

Alla maxay intay erayadaasi sodeen reer Guuleed qalbiyadoodu la ciriiryoomeen farxad ay u q abaan adista dalka iyo dadkaa cusub ee ay u socdaalayaan, Laylase waxay erayadaasi abtigeed uga darnaayeen gantaallo si naxariis la'aana loogu toogtay.

Iyada oo argagaxsan bey tiri;-"Abti ma kaa dhabaa



oo Nayroobi baad noo wadaa?"

Abtigeed baa yiri;-"Haa abti, waliba berri oo kaliya baan haddii alla idmo joogeynaa, berri dambena waxaa laga yaabaa inaan baxno haddii wax noo hagaagaan."

"Abti maxay tahay degdegsiimadaasi, maad toddobaad iska nasatid dabadeed aan iska baxno e".

Guuleed oo ka shakiyey su'aalaha gabadha una maleeyey iney rabto haritaan baa yiri;-" Abti ma inaad joogtaad rabtaa, miyaadan jecleyn inaad na raacdo, ma dhibsaneysaa bixitaankayaga? Abti ma meel aad ku hartaad heystaa? Maxaase ku reebaya?. Nayroobi haddii aan tagno qof aqoon leh baad tahay oo marnaba shaqo ka weyn meysid ee abti markaad hanti yeelato oo dhaqaale ku kaafiya hosho meeshaad rabto ka bax, laakiin hadda abti xagee kaaga tagaa, anba dan baa igu qasbeysee waddankeyga waxba kuma doorsadeene......."

Layla oo rabta iney abtigeed shakiga ka saarto ayaa lasoo booday;-"Alla abti xagee ku hari lahaa, waxaan rabay oo kaliya inaad nasato oo adaan dhibka kuu diidanaaye."

"Micno ma leh oo dano badan oo iga lumaya ayaa i dedejinaya" ayuu ugu jawaabay.

Layla waxaa ka yaabiyey sida wax waliba u dhaca-

-yaan. Kama hari karto abtigeed oo malaha meel ka Ie oo ay u eersato aan ka aheyn Axmedkii reer-koodu hore usoo masaafuriyey, raa cistooduna wa-xay sababeysaa iney boqollaal KM ka dheeraato mi-dkey kalgacalka wada qeybsadeen.

Tan kale dhowr beri ka dib waxaa Muqdisho u bixi lahaa C/casiis oo dhambaal qaayo leh ay rabtay iney ugu sii dhiibto xabiibkeed Axmed, laakiin ma noqon taasi.

Waxay diyaarisay warqad ay wax waliba ku ddil yi-hiin, uguna talo ga shay iney C/casiis usii dhiibto, intey ubaryo aad u qurxoon midabo aragga soo jiidan-ayana leh ku sharaxday oo buqshad ku hubsatay sawir qaali ahna dhex gelisay bey ku dhaqaaqday baadi goo-bka C/casiis, maalintii uu u sheegay(Jimcaha imu u imaan doono) ka hor ay baxayaan.

May aqoon hoyga C/casiis iyo meel uu degmada uga noo-noo I yahayba, markey galabtii hore weydiisay;-"Walla-al xagee kusoo degtay oo lagaa heli karaana?" Wuxuu ugu jawaabay;-"Abbaayo inta aanan bixin maalinta Jimcaha-aha baan kuu imaan doonaa ee sii diyaarsa warqad iyo wixii kale ee wara ee aad u direyso Axmed."

Sidaa awgeed waxay is tiri bal tijaabi nasiibkaaga inaad meelahaas ku aragto C/casiis inta aadan bixin.



Subixii iyo galabtii ay reer Guuleed isdiyaarinta ku jireen Layla waxay awoodda saartay iney hesho C/-casiis si ay ula soocdsiiso arrinta degdegga ah ee lasoo deristay, dhambaalkana ugu dhiibto.

Nasiibku uma oggolaan taa Layla, waxaana la gaaray subaxnimadii ay reer Guuleed u ambabixi lahaayeen sa-farkii dheeraa, iyada oo gacanta ku haysata dhambaalkii ay damacsaneyd iney u dirto ayey Layla laaoday guudkii gaarigii qaadi lahaa, sagaalkii arocrnimana way baxeen.

Galabnimadii Jimcaha sidii ay ballantu aheyd ayuu C/casiis soo balleeyey gurigii reer Guuleed oo ay dh-owr beriba kasii maqnaayeen. Albaabkii ayuu gargara-acay, waxaa ka furtay hooyadii guriga, suuyes-"Eeddo Layla ma joogtaa?

"Gurigoe rabtay?" bey weydiisay.

C/casiis;-"Eeddo soo gurigii Guuleed maaha?"

"Haa maandhoow doraad subax ayey reerkaad sheegeysaa u ambabexeen dalka Kenya." bey islaantii tiri.

C/casiis;-"Yaa..Goormay bexeen? Layla ma raacday?"

"Odeygii maqnaan jirey ayaa u yimid, dhammaantoodna way guureen" bey u celisay.

C/casiis;- "Wax farriin ah ma idiin ku dhaaftay?"

"Maya hooyo" bey iyana tiri.

Cabbaar ayuu inta aamusnaa wuxuu ku hadlana garan waayey buu yiri;-" waa yahay eeddo" oo dib isaga noqday, aroornimadii dambena bas ayuu kasoo raacay magaaladii, isaga oo aan dhambaalkuu fil_ayey u sidin saaxiibkii. Markuu yimid Xamar isagoon wasan buu u jeheystay Axmed gurigoodii, wuxuuna la sooodsiiyey sidey wax u dhaceen.

Run ahaantii Axmed aad buu uga tiiraanyooday arintaa, wuxuuna marar badan is lahaa;-"Tolow maxay tahay mucjisada idin ku kala dhex jirtaa!!!"

Markuu C/casiis ka tagay xaqiiqdii waa ka muuqatay in Axmed niyad jab weyni ku dhacay, wuxuu filan waayey jawaabta saaxiibkii u keenay, wuxuu go'aansaday inuu mar uun aad degmadaa si uu usoo helo xog-ogaalka dhabta ah ee Layla, laakiin kalama kulmin intii C/casiis u sheegay wax ka badan, isaga oo quus ah ayuuna isaga soo noqday.

Muddo dheer ka dib waxay hanatay nolol raaxo leh:

Bilo ka dib waxaa lasoo dhejiyey imtixaankii, labadoodiibana way baaseen, weliba darajo sare ayey ku gudbeen. Axmed markuu shqadii Qaranka dhameystay wuxuu galay Jaamicad, wuxuuna helay K_ulliyadda dha-



-qaalaha ee Jaamicadda Ummadda Soomaaliyeed.

Layla ayaa/ma ka dib waxay balleysay Nayroobi, waxayna si rasmiya uga mid noqotay sukaanka magaabadan, maadaama ay aheyd qof aqoon leh oo karti badan, taqaanay dhowr luuqadood, waxay awoodda saartay sidey ku heli laheyd shaqo, si ay uga baxdo gacanta aadamiga ee ay ku tiirsan tahay.

Taasi way u suurta gashay oo laba bilood ka dib waxay ku guuleysatay iney hesho shaqo wacan. Waxay caadeysatay iney shaqeyso waqtiga loogu tala galay labanlaabkii ama ka badan si ay s aacado dheeraada (Over Time) u kasbato.

Muddo yar dabadeed waxay heshay hanti kaafisa nolosheeda iyo ka badan, waxay awoodday iney kasbato xoolo badan muddo gaaban, waxay nafteeda u hurtay sidey ku heli laheyd xoolo mustaqbalkeeda waxtara; iyada oo ka faa'iideysaneysa wacdarihii waayuhu badeen.

Maadaama ay Layla aheyd mid aad u firfircoon, karti badan, edeb iyo akhlaaq leh waxaa hunguri ka galay rag badan ayse gaashaanka ku dhufatay.

Waxaa ugu darnaa Kaarshe oo abtigeed ay aad saaxiib u ahaayeen. Markuu iyada beer jileec ka waayey buu inta abtigeed u tagay ka codsaday inuu siiyo.

Layla waxay abtigeed u sheegtay un i yada maskax iyo caqli ilaah siiyey, ayna iyada xulaneyso midka mustaqbalka nolosheeda ay la wadaagi doonto. Sid-aasaa Kaarshe ku quustay walooW uu muddo dheer ku-soo noqnoqonayey.

Waxaa maskaxdeeda ka guuxayey xusuusta erayadii naxariista loogu dowgalay ee Axmed, kii noloshee-da qeybta weyn ku lahaa, kii gacan qabtay xilli ay aad u tabar darneyd, kii kalgacalku walaaleeyey, a-xdiga adagina ka dhexeeyey, waayuhuna kala tuureen.

Waxaa marar badan kusoo maaxanayey xusuusteeda eraya dan;-"Waxay ila tahay ifka waxaan ku leeyahay hal qof oo aan nolosha wada qeybsanno(haddii alla isu kaaya daayo); si aan qofkaa ku helo waxaan ga-lay raadis dheer iyo xulasho, waxaad tahay ruuxa kaliya ee aan dhowrka bilyan ee dumara ee ilaaheen koonka ku khalqay ka doortay. Waxaan kuu ballan qaadayaa gacaliso inaanan damcin gabar kale adoo ifka saaran. Haddii ay jiraan laba wacad kala qaada oo u ooFisa sidii uu ahaa, ilaahna u aqba-lo aroos farxadeedna labadeenna ayey noqon ee ab-baayo macaan nabadgelyo." ee uu Axmed ku sagootin-ayey markii arageeda ugu dambeysay, isaga oo caashaq iyo murugo la ilmeynaya.



Taas oo ku dhalisa Layla niyad bira oo ay kaga hortagto shaqsi kasta oo isku daya inuu fasahaadiyo xiriirka qotada dheer ee u dhexeeyey iyada iyo Ax-med.

Maalin baa waxaa casuuntay Layla gabar saaxiiba-deed ah oo ay isku meel ka shaqeeyaan, aadna isugu fiicnaayeen, qadadii ka dib ayey gabadhii tiri;-"Abbaayo waxaad ila soocdsiisay qisadii cajiibka a-heyd ee noloshaada iyo inaad axdi guur wada laheydeen wiil jira Muqdisho iyo Soomaaliya oo boqollaal KM idiin dhexeyso.

Waxaad tahay gabar caqli, garasho iyo qurux ilaah ugu deeqay. Waxaad leedahay hadda magac iyo haybad aad luguugu tixgeliyo, wiilal badan oo dhallijyaro ah oo qaarkood ka mid yihiin ilmaha taajiriinta magaalada ayaa kugu waashay oo ku calmaday, adna aad fikradoodii aad gaashaanka ku dhufatay, hadda abbaayo macaan waxaan maa-nta kuugu yeeray arrin talo ah oo aan ra eynayo inaad iga aqbali doonto, adoo og inaanan waligeey kugula ta-liyeen waxaan dantaada aheyn ee abbaayo maqalkaaga adoo deggan i amaahi wax yar."

Layla oo ka baxsan waxa ay soo wadato saaxiibadeed ayaa inta dhoola caddeysay tiri;-"Haye..Bal wad!!!"

Amran;-"Abbaayo Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa

(miro geed saaran kuwo gunti ku jira Looma daadsho) waxaad tiri waxaa axdi naga dhexeeyey wiil Xamar jira oo aadan ka warqabin wuxuu sameyn doono, maadaama aad muddo muddo dheer is moog tihiin, walibana ay jirtey gabar u doonaneyd oo inuu guursadeyba hadda laga yaabo.

Abbaayo adduunyadu waa laba maalmood, maalin kugu lid ah iyo mid aad leedahay, waxaad tahay ubax dhaoaya oo xilli kooban xiisihiisu ku xiran yahay, waxaa maanta kaa dabayaaoaya kumanaan dhallinyaro oo aad ka xulan karto midkii aad damacdo oo ku oajabiya, gaar ahaan Laylaay ma og tahay in wiilka Saacid ee aad la socoto magaca, haybadda iyo hantida aabbihii leeyahay uu aawadaa la macaluulay.

Marka walaaley ha noqon macangag meel uun qabsada ee fekex oo sida isu dhaan, mustaqbalkaagana ha ku xirin oo ha isaga lumin wiil aadan ka warqabin wuxuu sameyn doono, masaafo dheerna aad kala joogtaan."

Layla aad bey uga kululaatay hadalkaa, waxayna ka xumaatay aflagaadada saaxiibadeed kula kacday Axmed, malaha haddii aysan ahaan laheyn Amran mid ku weyneyd hadda ka hor waxay kala kulmi laheyd wax kale, inta kacday oo boorsadeedii gacanta kusoo qabsatay ayey iyadoo weli Amran jawaab ka sugeyso iska dhaqaaqday.



Amran markii ay aragtay heerka uu gaarsiisan yahay xanaaqa ay Layla ka xanaaqday, ayna ka xumaatay erayadii ay is laheyd ku waani, ayey inta ka daba boodday oo isku duubtay labada dhabanna ka dhunkatay tiri ;-"Abbaayo kun jeer raalli ahoow, aniga waano ayey iga aheyde."

Layla oo weli taagan dhidid yaryarina qooyey wejigeeda ayaa ugu jawaabtay;-"Waligey isma oran Amran ayaa gefka intaa le'eg kuu geysaneysa, haddii ay dulmiilaysaa kusoo dirdireen abbaayo aniga iyo Axmed dhexyada ilaah mooyee aadmi ma geli karo. Hilibkii aabbahay buu iga yahay ninkale isaga oo ifka saaran haddii aad ku qanceyso taa, boqol saniba ha igu qaadatee waxaan sugayaa isaga ee waxaan kaa codsanayaa inaadan wax oo kale mar dambe igula kicin."

Amran oo aad uga argagaxday sida saaxiibadeed uga xumaatay erayadey is laheyd ku waani baa tiri;-"Abbaayo raalli iga ahoow oo xaal qaado."

Laylana iyada oo caloosha iska leh"Wallee waad isu key sheegtay, illeen dad iyo duurba waxaadan fileyn baa kaaga soo baxa, ma markey aniga beer jileec iga waayeen bey iyada soo adeegsadeen............Mindhaa ima dagtid maanta ka dib Amraneey......"

bey ir/idda ka baxday.

Markey Nayrocbi joogtay saddex sannadood iyo afar bilood, waqtiga intaa le'egna aysan wax wa-ra ka helin xabiibkeed Axmed, oo xataa midkoodna uusan kan kale noloshiisa ka warq abin ayey ku/dhaqaaqday fikrad cajiiba.

Axmed ma laheyn meel wararka loogu soo hagaa-jiyo, dad fara bada n oo ay waraaqo gacanta uga soo dhiibtayna wey ku guuldareysatay.

WAXAY DIRTAY DHAMBAALKII NAXARIISTA $$
$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$$

Layla waxay ku dhaqaaqday arin cajiiba, waxay heshay fursad qaaliya. Baarliin oo aheyd saaxiib/ay aad isugu fiican yihiin; sannad ka horna Soomaa liya ka timid ayaa u sheegtay iney Muqdisho u socoto. Baarliin axwaasha Layla way ka dheregsaneyd oo taako taako ayey uga warqabtay arrimaheeda.

Inta diyaarisay dhambaal maanta ku Maaliya noloshooda ayey Baarliin farta ka saartay, oo inta tilmaan buuxda siisay ku celcelisay;-"Abbaayo macaan wax kasta ha kugu qaadatee awoodda saar sidaad ku heli laheyd wiilkaa marka aad tagto Xamar, walaaley xataa haddii ay xaafaddii ka guureen ra-




-adi wax yaqaan meesha ay deggen oo abbaayo haddii lacala aad weydo bokiskaas iigu soo dir akhbaar, haddii aad heshona isagaaba iisoo dirin; laakiin abbaayo bilba hakugu qaadatee wiilkaa waa nolosheydee helidiisa ku dedaal."

Run ahaantii Baarliin waxay aheyd qof mutacalim ah, ballantana tixgelisa, waxay Layla dhaar ugu martay iney si ay ku heshoba warqadda gaarsiin doonto yarkaa.

Maalintii ay Baarliin kasoo dhoofeysay garoonka diyaaradaha ee Nayroobi, Layla waxay saacado ka hor waqtigii bixitaankeeda ku diyaar aheyd gegida, si ay Baarliin ugu adkeyso ballanta.

Galabnimo Axada ayey soo caga dhigatay garoonka Muqdisho diyaaradii, tee? Tii sidey dhambaalkii Nolosha, dhambaalkii NAXARIISTA, kii badbaadada qalbiyada isu ooman, dhambaalkii rajada.

Baarliin markay tagtay gurigoodii ee nasatay ayey damacday iney raadiso tilmaantii Laylá soo siisay, balse maadaama ay goor dambe aheyd ayey berri u dhigatay.



**Waa Diyaaraddii, tee? Tii sidey Dhambaalkii nalesha, Dhambaalkii miyadda, Dhambaalkii nabadda, Dhambaalkii naxariista.**



Subaxnimadii dambe 8:00dii arooraha ayey soo kaxaystay gaarigii aabeheed, iyada oo gacanta ku sidata warqaddii tilmaantu ugu tiilay iyo dhambaalkii Axmed soo direy. Sidey usoo socotay bey gabar yar ku tiri;- "Abbaayo gurigii Xaaji Ciise aaway?"

"Waa kan" ayey ugu jawaabtey inta meel aan ka dheereyn albaab ah farta ugu fiiqday.

Baarliin iridii ayey gargaraacday, waxaa ka furtay Cowralla, Axmed hooyadii, salaan ka dib ayey Baarliin tiri "Hooyo sow gurigii X? Ciise maaha?"

Cowralla;-"Haa hooyo."

Baarliin;-"Eeddo Axmed baan rabay."

Cowralla;-"Hooyo jaamicaddii buu jiraa".

Baarliin;-"Nasrana aaway?"

Cowralla;-"Hadday baxday waxayse soo noqoneysaa oo dukaan ayey sonkor ka doontay ee maxaan u sheegaa?"

Baarliin;-"Eeddo waan sugayaa, sow ma soo dhaqsaneysa"

Cowralla;-" Haa eeddo, hoo kursigaan kusii fariiso."

Wax yar ka dib ayey Nasro albaabka kasoo gashay. Nasiib darro midkoodna kan kale ma yaqaan, Baarliin baa hadalkii ku bilowday;-"Abbaayo Nasra sow ma tihid?"

Nasro;- "Haa abbaayo."

Baarliin;-"Abbaayo adaan kuu baahanahaye wax yar banka ina keen", oo geysatay baabuurkeedii dhexdiisa, kadibna la socodsiisay dhammaanba farriimihii Layla,

iney tilmaan ku soootayna u sheegtay.

Run ahaantii Nasro farxad iyo filan waa ayey la dilaaci gaartay, waayo wax walba waxaa uga dar naa dhiba-atada walaalkeed haysata, sida uu isu badelay iyo moraal ja-bka ku dhacay gabadhaas dartoed, oo tiri;-"Abbaayo waxaan kuugu abaal gudnc ma naqaan, walaalkey waxaa la deristay dhibaato Iixaad leh, isagii oo dhan wuu is badelay, had iyo jeer wuxuu ku jiraa feker iyo isla hadal. In ka badan shan jeer ayaa la quraan saaray sannadkan kaliya, ka dib markii laga baqay inuu waasho, waxaan had iyo jeer afkiisa laga weyn oo uu ku wardiyaa;-(Layla...Layla meeday?..Xagoo aaday iwm) marka abbaayo waxaan u maleynayaa inaad tahay badbaado ilaah usoo direy nafta walaalkey.

Baarliin baa su'a ashay;-"Oo aaway gabadhii la rabay in Iagu daro?"
Nasro;-"Alloow qof aan wax ogeyn ha cadaabin, naa sidey uga daba laabaneysay markey wax rajo ah ka weydey bey haleenkii dambe ninkale isku xirtay, haddana caruur beyba leedahay."

Baarliin;-"Oo hadda waalidkiis ma u ogol yihiin inuu Layla guursado?"
Nasro;-"Ma ogol yihiin aa? Inta jeer oo aabbahay uu farriimo soo direy ilaahbaa sheegi kara ee Laylaa

coo



meel ay jaan iyo cirib dhigtay la waayey, lix bilood ka hor mar uu Axmed aad u jirraday wuxuu aabbahay damcay inuu Nayroobi iska soo aado bal inuu helo Layla, laakiin haddana way u suura geli weyday."

Nasro waxay diiday iney Baarliin ka reebto dhambaalkii, waxayna tiri;-"Abbaayo haddii aan kaa qaado waqqadda su'aal iyo xagee..Yaa keenay buu igu wareerinayaaye wallaal aan ballano berri subax aroortii una wada tagno wuxuu dhigtaa Kulliyadda Dhaqaalaha ee J. Ummaddee."
-Baarliinna way ka oggolaatay.

Subaxnimadii dambe ayey Nasro iyo Baarliin isu raaceen Jaamioada. Sidey usii soodeen bey indhaha ku dhufteen isaga oo derbi kaligii fadhiya, ardoydii kalena ay labalaba iyo koox koox wax u akhrisanayaan.

Nasro;-"Abbaayo waa kaas kaligii jardiinaya dhafooradа haysta", sidey ugu sii soodeen bey Nasro ku salaantay (Wallaal, gabadhaan waxaa Nayroobi...Inteysan hadalkii dhameyn buu inta soo booday oo gabadhii ku jeestay yiri"Yaa"
Nasraa tiri;-"Waxay farriin kaaga sidaa Layla". Intaasi markey afkeeda kasoo baxday buu isaga oo neefta soo ceshan la' yiri;-"Alla abbaayo ma Nayroobi baad ka timid? Layla ma aragtay? Sidee ahoyd..iyo su'aallo kaloo badan buu is raacsiiyey, isaga oo aad moodid inuu khalkhalayba.

Baarliin si deggan bey arrimihii oo dhan ula so-
codsiisay Axmed. Waxay u sheegtay in iyada qudheedu ay ka daran tahay oo aysan hilmaamin; waxay tiri;-intii aan saaxiibka aheyn gabadhaa in ka badan kun jeer bey iigu soo celcelisay ammaantaada iyo heerka jaceylka ay kuu qabtaa ka joogo. Markey garoonka diyaaradaha ee Nayroobi igula soo ballameysay waxaan indheheeda ku hubaa ilmo kaga timid xusuustaada, waxaan run ahaantii marar badan aad ula yaabi jirey heerka muxibada ay kuu qabtaa gaarsiisan tahay."

Markaa ka dib Baarliin waxay Axmed ku wareejisay dhambaalkii iyo sawiradii ay Layla usoo dirtay. Muddo ka badan laba saacadood buu Axmed gabadhii la daba joogay wareysiga Layla ilaa Nasro ka tiraahdo;-"War heedhe su'aallo badnidaa, gabadhii waad daalisaye." markaasuu isna ugu jawaabay;-"Alla abbaayo macaan kun jeer raalli ahoow wax aanan fileyn baad ila kulansiisaye ilaah wax kheyr qaba waqti kasta ha kuugu bishaareeyo" buuna gabdhihii soo dhaweeyey ilaa wadada.

Markuu kasoo noqdeyna inta jardiino cidla ah kaligii tagay buu galka ka jeexay warqaddii si aan miyir laheyn indhaha ula raacraacay;-

Gacaliye, Iga hoo hambalyo qaaliya, iga guddoon



Salaan ay isu diraan walaalo is jecel, qalbiyo isu ooman, wadnayaal wadaagay cishqi dhaba tii ugu qiimaha badneyd.

Salaan ka dib, waxaan kuu soo dirayaa dhambaal ku qaaliya nolosheyda taadana aan filayo inuu saameyn doono, dhambaal la ciiraya muxibo iyo jaceyl riyada, WAA DHAMBAALKII NAXARIISTA oo aan hubo inuu ebbe idanki weji cusub iyo horumar u furi doono nolosheenna.

Waxaan ku noolahay Nayroobi, waxaan helay shaqo fiican, waxaanna dhistay mustaqbal wanaagsan. Caafimaadkeygu waa caadi, mana qabo waxaan ka aheyn boholyowga iyo xusuusta muxibadeeda, adna waxaan ilaaha wax walba awooda kaaga baryayaa inuu kuugu deeqo cimri dheer iyo caafimaad san.

Gacaliye,

ma waa beriisan, gabalna iima dhicin, mana cawo beryin maalin qura iyada oo aysan qalbigeyga ka buuxin xusuustaadu. Niyaddu weli waa sideedii, ma damcin haweysanna maayo waligay adeo nool kin kale. Waxaan weli kor u hayaa kana dhowraa beerka axdigeennii qaaliga ahaa aroo huba adna in aadan iga liidan.

"Xabiibkeygiyoow haddii dhambaalkani kusoo gaaro deg deg iiga soo jawaab."

LAYLA WARSAME
NAYROBI KENYA

Wuxuu kusoo naaxay ilmo qoysay warqaddii uu akhrinayey. In ka badan shan jeer buu akhriskeedii dabiyo dacal bogay. Axmed laguma arag farax iyo reyn reyn intaa Ie'eg tan iyo maalintii ugu dambeysay aragga Layla. Wuxuu dareemayey nafis, waxaa gashay rajo cusub iyo niyad khheyr leh; ardey badan ayaa la yaabtey maalintaa jawiga fiican ee Axmed wejigiisa ka muuqata.

Wax yar ka dib wuxuu la kala baxay dhowr warqadood, wuxuu ku tafaftiray nolèshiisa. Waxaa erayadii warq-addaa ku qornaa ka mid ahaa;-"Abbaayo helay dhambaalkaagii, dhambaalkii nolosha, dhambaalkii niyadda, dhambaalkii naxariista, dhambaalkii rajada lahaa; wuxuu ii furay waddo cusub, wuxuu igu abuuray niyad san iyo nafis, wuxuu iga dul qaaday culeys iyo murugo waqti dheer i daasha-day.

Tan iyo maalintii isugu kaaya dambeysay sannado ka hor ilaa daqiiqadii aan helay warqadaada iima suura gelin inaan ku noolaado nolol caadiya aawadaa. Basra tii u sabab aheyd kala tageenna markey wax naxariis ah iga weyday bey mehersatay nin kale; hadda iyo dan waalidkey waxay u coman yihiin aragaaga, waxay diyaar la yihiin wax walba oo khuseeya nolosheenna iney moo qabtaan.

Abbaayo macaan haddii ay suura gal tahay wax



walba waxaan ka door bidayaa imaashahaaga oo degdega" iyo erayo kale oo uu xushay buu Axmed kusoo gunaanaday warqadiisii.

Markuu dhameeyey buu kor uga hubsaday cinwaankii cusbaa ee Layla usoo dirtay; aroornimadii dambena wuxuu geeyey boosta. Maalin ka dib ayuu mid kale direy isaga oo ka cabsi qaba in taasi meel kale ka baxdo; toddobaadkii gudihiisan wuxuu direy 4 warqadood oo midba mar tahay, ilaa uu boosta kasoo qaatay dhambaal qiimo leh oo ah kii labaad ee Layla usoo dirtc.

Waxay usoo sheegtay war run ahaantii markuu akhristay farxad uu la duuli gaaray, waxay tiri;-"Abbcowe iska daa bohoIyowga iyo welwelka, anba waan kula qabaa ututta caashaqee. Waxaan ilaah ku mahadinayaa iney waalidkaa maanta u diyaar yihiin aroc skeenna; ma sii joogjoogi karee bishan 15keeda ayaan soo baxayaa, Nayroobina waan kasoo guurayaa oo gacaliye nabadgelyo!

"MA DHAMAADO WAQTIGAAD SO: DHAWEYSATAAYE DHEERAA.... DHEERAA MUDADU....!!!!" Axmed sannado bey kala tiro badatay 15kii beri, wuxuu sugi waayey imaashaheeda.

Waxay gaartay maalintii ballanta. Dhowr saaca-

-dood ka her imaatinkii diyaaradda ayuu Axmed garoo-nka ku diyaar ahaa.

Shantii galabnimo oo sakeno diimar ayey soo oogadhigatay diyaaradii sidey Layla oo ay soo dhaweynteeda u diyaar yihiin reer X. Ciise oo dhan.

Run ahaantii haddii aysan sawiradeeda soo dirteen lama garteen, waayo qurxdeedii iyo haybaddeedii sabooltinimadu qarineysay ayaa soo banbaxday. Waxay soo muuqatay iyada oo aad moodo mid ka mida xuurcl ceyntii jannada oo booqasho ku timid dunida, sidii wax waalan bey miyir la'aan isugu soo boodeen iyaga oo aan is ogeynna meel ay joogaan.

In ka badan dhowr daqiiqadood ayey isku marnaayeen ilaa midba dhabarkiisa ka dareemo qoyaanka ilmo kulul oo kalgacal dartii kaga soo dareertay indhaha qalbiyada muddaba isu oomanaa.

21 maalmood ka dacdina waxaa loo qabtay xafladdii aqalgalka 11 sano ka dib isbarashadoodii.

DHAMMAAD

Qoraagu waa:

Yaasiin Jaamac Nalar-Fahax

" Gacaliye yeelo karti iyo kalsooni aad ku waajahdo wejiyada birta ah ee waqtiga. Ogoow dhibaato kasta iney leedahay waddo lagu xallin karo haba raagto ha-dday rabtee.........

Ogoow noloshu iney tahay wado aad u dheer, meel aad uga leexataana aysan jirin, wax kasta shar iyo kheyr ay kugu sugayaan; waxaa laga yaabaa daqiiqad adigoo la kulmey guul iyo sacaado aadan weligaa fileyn in mirir-kii ku xigeyna ay ku balleyso musiibo xusuus tiiraanyo oon tirmin ku reebta qalbigaaga...........

Ogoow insaan dunida jirin ruux lagula ballamay dhi-baato joogta sida uusan u jirin mid farxad iyo baraare ku waara; marka ha is raacsiin wax kasta oo ku farax ama tiiraanyo geliya ee ogoow iney mar uun dhamaanayaan."